
# JUULA-JAWAAY




*Mogadishu – Somalia*

*Tel: 0615152000-0615874055-0615562556*

*Email: Info@smrrc.org.so or smrrc1@gmail.com*

***Website**: smrrc.org.so*

# J U U L A - J A W A A Y

*Waa Majallad Saddex Bille ah*

*Waxaa soo saarta: Hey'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed*

## *Juulo-Jawaay Magazine*

*It is quarterly and is issued by Somali Marine Resource Research Center*

Cadadka 2aad eebisha April, 2015

Number Two of April, 2015

Sicirka = USD 10

Price = USD 10

Dibada waxaa ku kordhaaya lacagta dirida

To send abroad will charge postal coasts

# Aragtideena Badeed:

1. Xaqiijinta Lahaanshaha Badaheenna.
2. Sugida Siyaadadeenna Badeed.
3. Badaheennu waa inay noqdaan kuwa nadiif ah deegaan ahaan iyo irmaan aan gureynin abaar iyo aaran.

# Our Vision of Seas:

1. To realize the ownership of our seas.
2. To ensure the marine sovereignty on our seas.
3. Our seas must be clean environmentally and trusty sources of our food security.

# Badaheenna:

1. Dhererka xeebaha badaheenna waa 3025 KM
2. Badka badeheenna wuxuu ka weyn yahay bedka dhulkeena in kabadan 2 jeer.

# Our Seas:

1. The length of our coast reaches 3025 KM
2. The area of our seas covers our land more than two times.

# Kooxda Qoraalada iyo Daabacaadda

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Dr. Maxamuud Sheekh Maxamed | Guddoomiye |
| 2. | MD. Saciid Xasan Abiikar | Xubin-Xogahaye |
| 3. | MD. Axmed Cumar Abshirow | Xubin |

# Kooxda Tifaftirka

1. Dr. Maxamed Cusman Cumar
2. MD. Cabdiraxiim Warsame Diiriye

# Badda Cas (Gacanka Cadmeed)

Waxaan kuleenahay 5 Jaziiradood (Agagaarka Saylac) iyo 3Laash (Carrab-Badeed), Dekedda Berbera iyo tan Boosaaso oo caalami ah.

# Badweynta Hindiya

Waxaan kuleenahay xeebta B/weynta Hindiya Caasimada Dalka iyo Dekedda Muqdiho, Dekeda Kismayo, Jaziiradaha Jubba iyo Seddex Laash oo waaweyn sida Salaama, Caanoole iyo Buurgaabo iyo Afka Wabiga Jubba.

# Red Sea (Golf of Aden)

We have five Islands and threeLashs, besides ports of Berbera and Bosaso.

# Indian Ocean

We have on the Indian Ocean coast the capital city of Mogadishu and its port, Kismayo port, the large mouth of Jubba River and Jubba Islands in south of Kismaayo city, the longest three Lashs such as Salaama, Aanoole and Burgabo.



MUDANE XASAN SHEEKH MAXAMUUD

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# FAALADDA MAJALADDA

## Doorka Afka Soomaaliga ee Hormarinta Aqoonta Dalka

W/Q: Md C/Nuur C/Qaadir Maxamed

Qorista Afka Soomaaliga halgan dheer ayaa loo soo maray: sanadii 1920kii ayaa aheyd markii la soo bilaabay hindisaha qorista rasmiga ah ee Afka Soomaaliga illaa xiligaasi waxaa lagu tartamaayey in si rasmi ah loo qoro, Cusman Yuusuf Keenidiid oo ka mid ahaa dadkii xakumaayay Beelaha Soomaalida qaarkood, fadhigiisuna ahaa magaalada Hobyo ayaa wuxuu soo saaray far lagu magacaabi jiray “Cusmaaniya” sanadkii 1922kii, fartaas oo meelo kooban ka shaqeysay ma aheyn mid ku wada baahday dalka oo dhan. 1950 kii illaa laga soo gaaro xukuumadii 1960 waxaa socotay howl ah sidee loo qori karaa farta Soomaaliga ma (CARABI mise LAATIIN), rag badan ayaa isku dayay inay Af-Soomaaliga qoraan sida: Ibraahim Xaashi Maxamuud, Xusen sh. Axmed Kadare iyo Muuse Galaal, dhammaan ragaasi waxay soo saareen qoraalo farta Soomaaliga inta u dhaxeeysay sanadkii 1950kii – 1960kii. Markii Xurnimada la qaatay 1960kii waxaa la soo bandhigay dhowr qoraal waxaana ka mid ahaa farta Shire Jaamac oo Laatiin aheyd iyo

Muuse Galaal oo soo saaray far alfabeeto Carabi ah, taasina waxaa ka danbeysay ka dib markii Dowladdii Xiligaasi jirtay oo madax ka ahaa Mudane Aadan Cabdule Cusmaan oo magacaawday guddi ka soo baaraan dega qoraalka farta Soomaaliga waxaana xubno ka ahaa:-

1. Muuse Xaaji Ismaaciil - Guddoomiye
2. Yaasiin Cusman Yuusuf Kendiid -Xubin
3. Max’ed Saalax Ladane - Xubin
4. Ibraahim Xaashi Max’ed - Xubin
5. Khaliif Suudi - Xubin
6. Mustaf Sh. Axmed Ladane - Xubin
7. Shire Jaamac Axmed - Xubin
8. Xuseen Sh. Axmed kadare - Xubin
9. Yuusuf Meegaag Samater - Xubin

Gudigaasi waxuu isku maandhaafay qaabka loo qoraayo farta Soomaaliga, waxaa wadaado ka kaceen masaajidyada halkaas oy ka iclaamiyeen in aan lagu qori karin farta Soomaaliga xuruufta Laatiinka waayo waxay ku doodeeyn (LAATIIN waa la diin).

Sanadkii 1969 markii ay dhalatay Dowladii Kacaanka 21 October oo uu hogaaminaayey JENERAL Max'ed Siyaad Bare ayaa waxay ku dhaqaaqday in la qoro farta Af Soomaaliga waxay awaamirtaasi saarneyd guddi uu hogaaminaayo Shariif Saalax Max'ed Cali, gudigaa wuxuu ka koobnaa 21 oo ah Xeldheereyaal afka Soomaaliga iyo lataliyaal, xubnaha guddigaas waxay kala ahaa yeen:-

1. Shariif Saalax Max'ed Cali - Guddoomiye
2. Yaasiin Cusman Kenediid
3. Mustaf Sh. Xasan
4. Axmed Cali Abuukar
5. Yuusuf Xirsi Ismaaciil
6. Muuse Xaaji Ismaacil
7. C/qaadir Afeey
8. Aw Jaamac Cumar Ciise
9. Dahabo Faarax Xasan
10. C/llaahi Xaaji Abukar - Xubin
11. C/llahi Ardeeye - Xubin
12. Xasan Sheekh Muumin - Xubin
13. Maxamed Nuur Caalim - Xubin
14. Maxamed Xasan Aadan (Gaheyr) - Xubin
15. Xirsi Magan Ciise - Xubin
16. Cumar Aw Nuur - Xubin
17. C/llahi Xaaji Maxamed (Insaaniya)
18. Iikar Baana Xadaad - Xubin
19. Aaqib C/llaahi - Xubin
20. Xuseen Sheekh Axmed (Kadare) - Xubin
21. Axmed Cartan Xaange - Xubin
22. Maxamed xaaji Xuseen (Sheeko Xariir) - Xubin

Gudigaas ayaa isku raacay farta Soomaaliga in lagu qoro “Latin”.

Muddo 22 bilood gudaheeda ayaa lagu diyaariyey bugaagta dugsiga hoose iyo dhexe, xarfaha hingaada af Soomaaliga oo ka kooban 5 shaqal iyo 21 shibane.

Markii la sameeyey dhamman waxyaabihii loogu diyaar garoobay qorista af Soomaaliga, ayaa si rasmi ah loo shaaciyey qoraalka farta Soomaaliga 21/10/1972dii, isla sanadkaas waxaa la qabtay howlo badan oo kamid ah dejinta naxwaha af Soomaaliga sida magac, fal, falkaab, sifo, lakiin sidaa ay tahay weli naxwaha iyo erayada qoraalka afka waa mid qabyo ah.

Kadib Dowladu waxay soo saartay go’aan soo baxay tariikhdu marka ay aheyd 1972kii lagu sheegay in afka rasmiga ah ee Jamhuuriyada Soomaaliya uu yahay Af Soomaali (Maxaa tiri).

Waxa dastuurka cusub ee qabyo qoraalka hadda ku qoran af-Soomaaliga inuu ka kooban yahay may iyo maxaa tiri.

Ragii ka soo shaqeeyay qoralka farta Somaaliga waxay mudan yihiin xushmad iyo qadarin, inta nool waxaan leenahay aad iyo aad baad u mahadsantihiin, inta dhimatayna waxaan ugu ducayneynaa in Illaahay ka warabiyo Jannaddii Fardowsa (Aamiin), waxaa maalmo ka hor ku dhintay Magaalada Muqdisho;



MD. Xuseen sheikh Axmed Kadare, taariikhduna ay ahayd 1dii febraayo 2015, isbitaal ku yaala Magaalada Muqdisho, Aabihii waxuu geeriyooday 9 jir isagoo ah, wuxu wax ku bartay Muqdisho, kuna dhameeyay Dugsi Sare, Xuseen wuxuu bilaabay iskuna taxluujiyay qoraalka farta Soomaaliga isaga oo diyaariyay fartaas oo loogu magac daray (Kadaraya).




Sidoo kale Xuseen ka hor, waxaa Muqdisho ku geeriyoday Shariif Saalax M. Cali Janatul Fardawsa Illaahey haka waraabsho.

**(Maqaalku wali waa socdaa)**

**Reference**
Somali Tok.com
Somalianation.com

# MAALINTA BADDA EE MAHADCELINTA RABBI

W.D. ADM GAAS FAARAX AXMED CUMAR

Baddu waxay qeyb wayn ka tahay nicmooyinka RABBI siiyey addoomankiisa, waa noolaha oo dhan oo dadku ugu horreeyo, waayo ayagu waxay leeyihiin caqli ay wax ku ogaadaan. Haddii aan eegno Qur'aanka waxaan ku arkeynaa 40 meeyo aayadood oo ka hadlaya BADDA iyo sida ilaahey uu HEBED nooga dhigay si aan uga manaafacaadsano kheyraadka ka buuxa badaha; hase yeeshee saddex aayadood ayaa si gaar ah u tirisey nicmooyinka Rabi ee Badaha, waana kuwaan: (Al- Naxl – 14), (Al- Jaathiyah – 12), (Faadhir – 12).

Nimcmooyinka laga heli karo badaha, sida ay tilmaameen, gaar ahaan, saddexdaas aayadood waxay yihiin:-

1. Waxaad ka cuntaan hilib cusub … (Al- Naxl, Faadhir).
2. Waxaad kala soo baxdaan waxaad isku qurxisaan (Al- Naxl, Faadhir).
3. Waxaa ku socda Maraakiibta aad adeegsataan (saddexda aayadood).
4. Inaad ka raadsataaan (BADAHA) kheyr dheeraad ah (saddexda aayadood.

Saddexda nicmo ee 1,2,3, aad ayaa dadku u yiqiin waqtigii Qur'aanku uu soo degayey, sidaas ayaana loo muujiyey; laakiin kheyraadka dheeraadka ah caam ayaa laga dhigay, waayo waqtigaas dadku ma aqoon; hase yeeshee hadda ayaa la ogaaday oo waa:-

1. Shidaalka (Saliid & Gaas) oo badda laga soo saaro.
2. Macaadin kala duduwan oo badda laga soo saaro.
3. In Tamar laga helo dhaqdhaqaaqa badda sida HIRARKA, QOLQULKA (Marine Current) iwm.
4. In biyaha badda laga dhigo kuwo la cabi karo, dhirtana lagu waraabin karo.
5. In looga faa'ideysto xeebaha iyo Jasiirooyinka Dalxiiska oo dakhli badan ka soo geli karo.
6. Iyo wax kale oon weli dadku kashifin oy soo socdaan (Inshaa ALLAH).

Waxaa la yaab leh in saddexdii aayadood ay wada xuseen inay waajib tahay in allah lagu mahdiyo nicmooyinka badaha.

Waxaa xusid mudan in Qur'aanku uu aad ugu nuux-nuuxsaday ahmiyadda mahad- celinta RABBI ee nicmooyinkiisa. Kalimadaha (XAMD) iyo (SHUKR) iyo wixii ku macna ah inay

ku jiraan inta badan suuradaha Qur'aanka. Aan mid kaliya ka xuso, waa aayadda 7aad ee Suuradda IBRAAHIIM oo leh: "HADDII AAD MAHDISAAN ALLE wuxuu idiin badinayaa nicmooyinkiisa" hadaba waxaa waajib nagu ah innaan badinno mahadda RABBI nicmadu nooc kasta ha ahaatee waqti iyo meel kasta: BAD iyo BERRIBA. Haddii arrintu ay sidaas tahay, waaba tahaye, wallee ma habboona in loo helo (Xaddido) maalin macruuf ah mahadcelinta RABBI ee nicmooyinka BADDA, sida loogu sameeyay maalin la xususto magacyo badan ama arrimo badan, sida maalinta DHIRTA, Macalinka, Dumarka, caleemo saarka boqor hebel … iwm. Intaan oo dhan iyo kuwo la mid ah waxba ma noqonayaan haddii la barbar dhigo nicmooyinka nolosha saldhiga u ah ee laga heli karo BADAHA.

Haddaba si aan u helno maalinta ugu mudan MAHADCELINTA RABBI ee nicmooyinka badda, waxaan ka tilmaan qaadaneynaa isla Qur'aanka, isla aayadihii xusay nicmooyinka badda, waa nicmada ay leeyihiin QORAXDA iyo BISHA, waa labada ma-daalayaasha ah (IBRAHIM:32).

Hadaba aan isweydiinno nicmadaha aan ka heli karno Qorraxda iyo Bisha. Jawaabtu waa DIIR iyo IFTIIN. Waxaan ku gaabsaneynaa waxa ay u taraan BADAHA, nicmooyinkaan.

I. <u>DIIR (HEAT):</u>

Waxaan tirinayaa dhowr nicmo oo diirku siiyo badaha, anigoon geleyn tafaasiil, waayo waxaan qabaa in aqristuhu leeyahay aqoon guud oo ah heer dugsi ugu yaraan.

1. Roobka, oo ka yimaada diiritaanka badda oo dhaliya uumi.
2. Dhaqdhaqaaqa hawada (DABEYSHA) oo ka dhasha kala duwanaanta cufnaanta hawada (Air Pressure), sidaasna ku dhaqaajiya daruurihii (saxaabkii) Roobka xambaarsan.
3. Roobka ka yimid markii hore badda, haddana intiisa badan wuxuu ku soo noqdaa badaha si uu u simo dhanaankii biyaha badda oo uumigii uu keenay.
4. Diirku wuxuu dhalaaliyaa Buuraha barafka ah ee waqooyiga iyo koonfurta dhulka si loo helo biyo dhanaankoodu uu yar yahay oo noolaha qaarkiis ay ku tarmi karaan sida SHIRIMBIGA.
5. Diirku wuxuu asaas u yahay dhaqdhaqaaqa biyaha badda sida HIRARKA, qulqulka iyo is-rogrogga badda oo sabab u ah bacriminta badda (cowska badda oo la baahiyo)… iwm.

Intaan aan soo sheegnay iyo kuwo kaleba waxay asaas u yihiin nolosha iyo taranka noolaha badda iyo TAMAR siintooda; waxaa hore loo yiri: *“Kuleyl (Diir) waa Nolol; Qabowna waa Geeri”*.

II. IFTIINKA:

Iftiinku wuxuu asaas u yahay abuurintaanka cows badeedka oy ku taagan tahay nolosha noolaha badda iyo Barriguba; waayo nolosha badda laga billaabo midka leh hal UNUG sida Planktonka ilaa Nibiriga oo qaarkiis beerkiisa laga shiilo 100 (Boqol) Barmiil oo Saliid ah, waxay u kala baxaan qaar daaqa cowska iyo qaar cuna hilbaha noolaha badda oo ayaguna cows ku nool, sidaa awgeed noolaha baddu wuxuu ku nool yahay cowska si toosan ama si dadban. Haddaba cowsku sidee buu ku dhashaa? Wuxuu ku dhashaa markii ay isla fal galaan Curiyaasha biyaha ku Milan oo helay IFTIIN, halkaasna waxaa ka dhasha maaddada CAGAARAN ee asaaska u ah Cows badeedka.

Haddaba markii badda ay hesho cows badeed Iftiinka awgiis iyo deegaan badeed habboon oo diirku keeno noloshii way tooseysaa waana soconeysaa intii ALLE DOONO.

**Tillaabta Xigta Maxey Noqoneysa?**

Tillaabta xigta waxay noqoneysaa inaan helno maalinta ugu dheer maalmaha ay Qorraxdu badda ku kor socoto oy siineyso Diir iyo Iftiin, ayadoo la og yahay in iftiinka iyo diirka biyuhu uu asal ahaan ka yimaado Qorraxda, oo bishu tixgelin weyn aysan laheyn haddii la barbardhigo Qorraxda oo ah Hooyo. (Hooyada Meerayaasha oo biluhu ka yihiin Meerayaal ah darajada labaad ee meerayaasha Qorraxda oo ah Darajada Kowaad).

Waxaan kaalmeysannay khariidada Dunida, waxaanna ka ogaanay in maalinta ugu dheer oo Qorraxdu ay marto BADAHA dushooda ayna siiso diir iyo iftiin fara badan waa Maalinta 21 ee December oo Qorraxdu ay isku taagto Xarriiqinta ugu koonfureysa safarkeeda (waa aragtida ishee) oo loo yaqan wareegga CAQRABKA ama Dabaqallooca (Copricon).

**Hey’adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed**, waxay kashiftay maalinta Mahadcelinta RABBI ee badaha dhamaadkii 2013 kii, waxayna u dabbaaldegtay si rasmi ah 21/12/2014 kii.

Haddaba waxaan u soo jeedineynaa Dowladdeenna inay

RASMI, heer Qaran ah, ka dhigto Maalintaan, si ALLA aan ugu mahadcelinno Nicmada BADEED oon lawada qabin, dadkeenna baahidu diletana aan ugu wacyi gelino si ay uga faa'ideystaan kheyraadka Badahooda, ugana baxaan darxumada, baahidda iyo sharaf darrida.

# MAXAA KA DHIGAY BADDA BULUUG?

W.D: MD/Hassan Osman Hassan



Mar marka qaar ma is weeydiisaa su'aashan "Maxeey baddu ugu muuqataa midibka buluugga? Ama ma aamin santahay fikrada ah in baddu buluug u tahay maxaa yeelay midibka Cirka ayee dib u soo celisaa? Hadeey jawaab taadu "haa" tahay, ma is weydiisay xiliga daruurta ey jirto maxey wali baddu buluug u tahay?, Hadaba Maqaalkan waxaaan si kooban ugu cadeyn doonaa sababta ka danbeeysay midibka buluuga ah ee biyaha baddu leeyihiin.

Waxey baddu buluug ugu muuqataa isla sababta ka danbeysay cirka inuu buluug ugu muuqdo, waxaan wada ognahay in dadku wax ku arkaan (Iftiinka Cad) ee Cadceeda ka yimaado, kaas oo ka kooban 7da midib ee asaasiga (Spectrum Seven), marka uu iftiinkaas ku dhaca dhibcaha roobka wuu kala jab jabaa ama leexad ayuu sameeyaa, waxuuna soo saaraa midibyada uu ka kooban yahay iftiinka cad ee cadceeda, waa marka aan aragno waxa loo yaqaan " Qaansa Roobaadka" ee quruxda badan dadka qaarna u yaqaanaan "Caasho Carab Dheer" ama "Seyn Roobaad" waxaana inta badan la'arkaa xilliyada Roobka.

Mar kasta uu iftiinka cad (iftiinka cadceeda) uu shey ku dhaco sida (Geed, Xayawaan, Dad, ama Dhagax) shey kasta oo kuwa aan soo sheegnay ah waxaa jira iftiin uu nuugo iyo qaar

kale uu iska soo celsho, hadaba iftiinkaas shucaaca ah “Specturum” ka uu soo celsho ayaa ku kala soocnaa midibyo, si'aad si fiican araktidan ugu fahantid kaalay tusaalahan ila eeg.

Falaaraha iftiinka cadceeda waxeey 49% ku baa ba’aan hawada, waxaa dhulka dushiisa soo gaaro 51% kaliya, markale markey biyaha badda uu iftiinka cadceeda ee wado falaaraha kala midibka ah ay ku dhacaan biyaha badda, midibka Guduudka (Casaanka) falaaraha wado guduha biyaha ayey ku dhax baa ba'aan ilaa 30m oo biyahaa nuugayo, sidoo kale midib yada kale Cagaarka, jaalaha, IWM, laakiin falaaraha xanbaarsan midibka Buluuga ah biyaha badda wey soo celi yaan, maxaa yeelay midibka Buluuga ah waxuu ku socdaa hirrar yar yar“ short wavelength” taasoo ku caawineysa inuu noqdo mid ey aad u fududahay inee falaarihiisa kala jab jaban ama gadaal uu uso noqdo (Reflected Back), laakiin falaaraha xanbaarsan midibka Casaanka (Guduudka) ah waxey ku socdaan hirrar dhaadheer “ long wavelength” inuu jajabo iftiin kiisa ama dib isku soo celsho ma fududo. Sidaas darteeda baddu midib yada kale oo dhan wey nuugtaa, midibka kaliyah ey soo tufeeyso ama dib u soo celineeyso waa midibka Buluuga ah, waana sababta aan ugu aragno baddu iney Buluug tahay. Markuu Cilmiga sii hormaray ee la soo saaray qalabka lagu qayaaso salka hoose ee badda waxey Culumadu ogaadeen falaaraha ifiinka ee ugu danbeeyo inay biyaha gudaha u soo gudbaan ay yihiin falaaraha xanbaarsan midibka Buluuga ah. Mugdiga daran ee ka jira salka hoose ee badda daraadeeda ayey Culumada Cilmiga Badda waxey aminsanaayeen iney nolol ka jirin, kadib markii Cilmiga sii hormaray ee la isticmaalay qalab hor marsan ee lagu baaro salka baddaha ayaa waxaa la ogaaday iney nolol ka jirto salka badda ayna jiraan xayawaano ku nool sida Gooryaan Baddeedka (Marine Worms) oo dhirirkiisa dhan yahay 200m, xayawaankaan ayaa wax ku arko midibka jirkiisa oo ah (Phosphoric) kaasoo iftiin soo daaynaayo, isla aragtidaas cilmiga ee Culumada soo ogaadeen dhawaan, ayuu Qur'aanku sheegay waqti dheer ka hor, fiiri aayada 40aad ee Suurada Al-Nuur, isla aayadaan waxey kuu sharaxeysaa midibyada is dul saar saarmay dhirirka hoose Badda ee keenay mugdiga daran ee badda hoose ka jiro.

Mar kale kaalay aan ku tijaabino isla tusaalahii hore Cirka (Samadda), markuu iftiinka cad ee ka imaanaayo cadceeda uu soo gaara Cirka, sidii oo kale qaar iftiin kaas ah Cirka wuu nuugayaa qaarna dib ayuu u celinayaa, iftiinka uu celinaayo midibkiisa ayuu qaadanayaa oo ah buluugga, hasa ahaatee markey Culumada tageen Samada sare (Space) waxey soo arkeen Cirka waxii ka sii xageeyo inuu yahay mugdi, taasna ma burineeyso aragtida aan horay idin kugu soo sheegay, maxaa yeelay Cirka waxuu iftiinka dib ugu celinayaa (Reflected Back).

Dhanka dhulka hoose ma'ahan dhanka sare ee Cirka sare (Space), sidoo kale badda waxey u soo celineeysaa iftiinka dhanka sare ee badda, saas darteeda badda hoose waa mugdi, waana xikmad uu Alle aqoonteeda leeyahay.

Waxaan filaa inaad maanta ka dib aad ogtahay sababta ay Baddu ugu muuqato midibka Buluuga.

# Sicirka Kalluunka Ee Suuqyada Muqdisho



Waxaa Hey'addu isku howshay inay ogaato sicirka noocyada kalluunka ee lagu kale iibsado suuqyada Caasinmadda; sidaas awgeed, Hey'addu waxay u direysay subax kasta suuqyada kalluunka 2-3 qofood oo soo tirakoobta noocyada kalluunka iyo sicirkooda.

Ujeeddadu waxeay ahayd in la ogaado tirada (quantity) soo gasha maalin kasta suuqa oo qiyaas uu noqon karta wax soo saarka (w.s.s) iyo Dakhliga ka soo geli kara.

Sidaas awgeed, waxaan garannay in Majalladan si is dabajoog ah ay u soo qorto wixii laga ogaaday arrintaas, isla markana la sii wado baaritaanka si loo naaxiyo xogta la helay.

Lanbarkaan 2aad ee Majallada Juulo-Jaway waxaan ku soo bandhigeynaa 4 nooc; waxaana sii

wadi doonnaa faafinta xogta kalluunka (xag tiro iyo xag sicir)

Noocyada la soo bandhigayo waxey kala yihiin:

1. Jeedar
2. Shiiraan
3. Taqo
4. Tartabo

Eeg shaxaha hoos ku qoran:

## Mogadishu fish market and prices

The center has activated to know the different types of fish and their prices in the fish markets of the city, thus, every morning the center used to send three persons to make statistics the types of fish catch and their prices.

The meaning was to know the quality per catch every day and the estimation of production, the income therefore; we have decided to publish what has been known of that issue and it is statistics.

This second number of **Julla-Jaway** we show four types of fish, and their prices.


These four types of fish are as follows:-

1. Yellow fish (Tuna)
2. Blue fish (Jarck)
3. Grouper
4. White meat fish

Please see the photos and tables below to know more.

**JEEDAR**







**SHIIRAAN**






**TAOO**






**TARTABO**





# DABAR-GOYNTA QUBADA



Qubadu waxeey ka mid tahay xamaaratada, ayada iyo qaar kale ee xayawaanada naasleyda ah, waxeey ku biireen oo la qabsadeen nolasha baddaha, Qubadu aad ayee u taqaan dabaasha taasoo ku caawisay inee si fiican ugu la qabsato nolasha badda, waxeey kaloo awood u leedahay qubadu iney biyaha hoose muudo eyna mudo ku jirto. Ayadoo arimahaas oo dhan jiraan wali qubadu dhulka bariga ayey u soo baxdaa oo ku duugtaa ukunteeda, ugana heshaa hawo fiican.

Qubadu waxa ay leedahay noocyo badan intooda badani ay dabar go'eyn waxaase ka haray 6 ilaa 8 nooc, nooc yadeeda waa weyn waa hilib cun, waxeey quud taan

kaluunka yar yar, nooc yada yar yar kana waxeey quud-taan Cows Badeedka, Qubadu dhago ma lahan balse ilaaheey waxuu ku

abuuray dareen aad u heer sareeya kaasoo u sahlay iney dhawaaqa hirarka ey wax ku dareento, waana mida u sahashay, goob aad u fiican aadna u amaan badan iney doorato xiliga ee qubadu dhadiga ah uku-maha dhigeyso, sidoo kale qubada nooca waa weyn arakti fiican ma lahan. Waxeey qubado cimrigeyda gaaraa ilaa 60sano ama ka badan in kastoo si fiican loo aqoon karin, fara galinta dadka ey gaarsiiyan owgeed, waxey culumada ku qayaaseyn inee ku qaan gaarto qubadu 13-30 sano.

**MAXAA KEENAY IN LA'ILAALSHO QUBADA**

Qubadu waxeey nooleyd mudo aad u dheer waxeyna sheeygan culumadu iney Qubadu jirtay waagii (Dinosaur)ka iyo xayawaano kale ee dabar go'ay, hasa ahaatee qubadu waxaa u suurta gashay inee xaladahaas adkaa ey la so qabsato kana soo gudubto, nasiib daro se hada qubadu

waxeey noqotay mid ku dhaw inee dabar go'do, ka dib markey bulshada caalamka badatay, goobahii qubada uku-maha ku soo doogan jirtay deegaan dad dagan yihiin laga dhigay, iyo sidoo kale ugaarsi fool xun oo xad-dhaaf ah oo loo geystay qubada, wiliba intaa loogu sii doray wasakhda kiimikada ah, balaastikada iyo walxaha sameeya (radiation)ka in loogu duugo laguna shubo xeebaha , iyo qashin nooc walba iskugu jiro, IWM, ee sida joogtada ah loogu geysto qubada, ayaa keentay in ay dabar go'eyn noocya ka mid ah, qaarka kalena ey ku dhaw yihiin, dadku waa noolaha ugu badan, ee sameeya bara-bixinta xayawaan kale. Intaas ka dib waxaa ka cod saneynaa cid kasta ey quseyso ama wax ka qaban karta arintaan, iney ku baraa-rugaan halaha ey dhantahay dhibta lagu hayo Qubada.

waxaa jira tiro hashiisyo iyo shirar caalami ah kuna saabsan ilaalinta Qubada, waxaa ka mid ah:-

- Hashiiskii Bonn 1979 ee ilaalinta nuucyada xayawaanada bariga ee guur guura, hashiiskaas cutubkiisa 1aad waxaa ku qoran " **waa in la dhowraa oo la'ilaalshaa Qubada cagaaran iyo Qubada madaxa balaaran,,.**
- Hashiiskii Barne 1997, ee ahaa ilaalinta nolasha bariga iyo tan dabiiciga ah.

Refrence:

Council of Europe, 1979. Convention on the Conservation of European Wildlife and Natural Heritage. Bern, Switzerland. Available at: http://conventions.coe.int/Treaty/EN/Treaties/Html/104.htm

http://www.gulfturtles.com/

# Magacyadii loo aqoon jiray Dalkeenna Soomaaliya

**(QEYBTII 2AAD)**

**W.D. ADM. GAAS FAARAX AXMED CUMAR**

Waxaan ku soo sheegnay Maqaalkii 1aad in ay ka mid ahaayeen Magacyadii loo aqoon jiray Dalkeenna Soomaaliya:-

1. Punt oo ka timid xagga Masar, socotana muddo dheer oo ku dhow inta aan la socdo 23Qarni, kuna soo dhawaatay dhalashadii Nabi Ciise (cs) (ilaa saddax qarni horteed); haddana waa la soo nooleeyey oo waa Punt-land (Waqooyi Bari Soomaaliya).
2. Funt (Phunt), asalkiisu wuxuu ka soo jeedaa YAHUUD, waxaanna ku soo tilmaannay inuu yahay isla Punt oo xoogaa la khalday dhawaqeeda, magacaani wuxuu xoog lahaa waqtigii xukunka Nabi Suleymaan (cs) qarnigii 10aad ee C.H.
3. Kuush oo ka yimid xagga Masar waxayna ula jeedaan dadyowga ku noolaa ka koonfur Masar, oo markii danbe lagu baahiyey Geeska Afrika, waana magac muujinaya midabka madow ama maariin. Waxaa xusid mudan in magacaani uu weli nool yahay oo dadyowga Geeska Afrika iyo waqooyigeeda waxaa ugu badan shucuubta ka soo jeedda kuwa kuushiitiga ah (Cushitic Race) oo Soomaalida ay ka mid tahay.

**<u>Maqaalka 2aad:</u>**

1. Magaca 4aad waa: Ethiopia, Magacani waxaa bixiyey Heridot, taariikhyahankii Giriigga qarnigii 5aad ee C.H. markii uu booqday Masar[1].
2. Magacaani wax kale ma aha ee waa isla kii Kuush oo afka Giriigga ah, waayoo waa mid xambaarsan midabka madow.
3. Magacaani markiisii hore loolama jeedin dalka Itoobiya ee hadda jira ee waxaa loola jeeday dadyowga ku nool inta u dhaxeysa Webiga Niil iyo Badweynta Hindiya. Magacaan Ethiopia wuxuu aad ugu dhegay ama ay ayagu ku dhegeen isuna aqoonsadeen wixii ka danbeeyay qarnigii 4aad ee C.D. Markii Dowladdii Aksiyuum (Axium) ee Ethiopia ay qaadatay Diinta Masiixiyadda oo Weliba uu soo gaaray kitaabka Diintaas oo lagu turjumay afka Giriigga oo lagu qoray Magaca Ethiopia halkii hore uu ugu ahaa Kuush[2].

Wixii ka danbeeyay 1275kii[3] markii qoyska Suleymaan uu xukunka ku soo noqday, dagaalna ay la galeen shucuubtii deriska la ahayd oy ugu horreeyeen saldanadkii islaamiga sida ilfaat, Cadal iyo 6da kale ee ka talineysay koonfurta HARAR iyo barigeeda … muddadaan dagaalka isballaarinta ay wadeen boqorradii Ethiopia (3qarni) waxaa aad u soo baxay magacaan oo noqday mid dowladi ay leedahay; magacaan wuxuu ku soo baxay khariidadii caalamka ee Potelmy Q.3aad ee C.H. oo ku fidisay dhulka hada loo yaqaan Ethiopia, Eriteriya, waqooyiga iyo bariga xeebta Soomaaliya; sidoo kale koonfurta Hindiya uu u bixiyey Ethiopianka bari[4] sagaal qarni kadib waxaa soo dhawaaday soo bixitaankii DIINTA ISLAAMKA. Waxaa la daabacay horraantii kontomaadkii qarnigii 20aad ATLASKA taariikhda Islaamka oy qoreen Mr HARY iyo Mr Hazard, uuna ku turjumay af Carabi; MD I. Zaki (Qaahira1955), waxaa lagu muujiyey ATLASKA magacyada loo aqoon jiray meel kasta. Qarnigii 7aad ee Miilaadiga oo billawday markii Nabi Maxamed uu jiray 30sano, waa ka hor 10sano soo daahiridda Islaamka; khariidadii laga sawiray Geeska Afrika waxaa ku qornaa magaca Ethiopia dhulka hadda ee Eriteriya, Ethiopia iyo xeebta waqooyi iyo bari ilaa Qandala; waxaana lagu qoray hadalkaan: Ethiopia waa dal Masiixi ah. Xeebta u dhexeysa Qandala iyo Raas Caseyr, hoosna u sii socota xagga Hobyo waxay khariidada ku magacawday ZINJI, waana dal aan Masiixi ahayn. (arinta Zinji waan ku soo noqon doonnaa Inshaa allaah), intaan aan uga sinto magaca Ethiopia[5].

Magaca 5aad AL – XABASHAH:

Magacaani waa mid mantaan la ah kii ka horreeyey ee Ethiopia, labadaan magac waxaa si isku mid ah isku macna ah loo isticmaali jiray 25qarni, walina way wada socdaan ayagoo labaduba ku baahsanayeen mandiqadda Geeska Afrika ugu danbeyntiina, waa hadee, waxay ku soo aruureen Dalka Ethiopiyada maanta loo yaqaan.

Magacaan asal ahaan wuxuu ka soo jeedaa galbeedka Yemen iyo Xijaas, waxaa la leeyahay in magacaani uu ka soo jeedo Qabiil Yemen ah oo la oran jiray Xabshat una soo haajiray galbeedka Badda Cas dhexbartankii kunkii sano ee ka horreeyey dhalashadii Nabi Ciise (cs)[6] tan kale magacaan wuxuu matalaa wixii uu matali jiray magaca la mantaanka ah ee itoobiya oo xambaarsan midab madow, gaar ahaan kadib markii muhaajiriintii Yemen ay ku milmeen dadyowga hore u degganaa Dalkaa. Sidaas awgeed, macnaha magacaan waxaa lagu sheegaa dadyow isku dhafan. Si kooban ayaan u soo bandhigeynaa magacaan, si maqaalka uusan aad ugu dheeraan:

1. Kutubaha taariikhda ee ku qoran afka Carabiga kana hadla Geeska Afrika, gaar ahaan wixii ka horreeyey Qarnigii 18aad ee Miilaadiga waxay ku tilmaami jireen dadyowga maanta ku nool Geeska Afrika magaca Al- Xabasha[7] sida:-
2. Markii Xabashida ay ku duushay Yemen qarnigii 6aad ee Miilaadiga oo ABRAHA hoggaamiye ka ahaa, wuxuu ku dhisay halkaas KANIISAD loo xajiyo si KACBADDA aan loo tagin[8].
3. CABDIL MUTALIB (Nabiga Awowgiis) wuxuu la ganacsan jiray reer Yemen; laakiin walaalkiis Cabdi Shamas wuxuu la ganacsan jiray reer Xabasha[9].

a) Asxaabtii Nabi Maxamed (cs) waxay u haajirtay Xabashi, culumada qaarkoodna waxay yiraahdaan Asxaabta waxay ka soo degeen Dekedda Zeylac (Zeylac = Xabasha)[10].

4. Waxay qori jireen kutubihii hore ee taariikhda, Xabashidu waxay leedahay laba Dekedood oo kala ah: ADDOLIS (MASAWAC) iyo ZEYLAC[11].
5. Atlas taariikhi ah ee soo baxay Qarniyadii dhexe wuxuu ku magacaabay Gacanka Cadmeed
   BADDA XABASHIDA, dekedaheedana wuxuu ku tirshay Mukalla (Yementa Koofur) iyo Salaala oo ka sii barrisan[12].
6. Dadyowga Jareerta ah ee u badan Koonfurta Soomaaliya waxaa loo yaqaan Xabashi[13], oo u muuqda in loola jeeday markiisii hore dadka dhulkaan Kuushiyiintu ugu timid.
7. Waqooyiga Soomaaliya waxaad maqleysaa kuwaani waa ilmo habar magaadley, kuwaanna waa reer habar Xubuusheed[14].
8. Waxaa la sheegaa in ODAY Hawiye uu qabay xaas Carab ah iyo mid deegaanka ah (Xubuush)[15].
9. Wuxuu qoray Al-Maqrizi: (Q.15aad) in Saldanada Xabashida ay ka mid yihiin: Cadal, Arabiini, Ifaat, Fatjaar, Dawaaro, Shawa, Baali, Hadya, Sharkha … Saldanada Muqdisho[16]. Tani waa caddeyn culus oo ka dhigeysa Muqdisho inay ka tirsan tahay dhulkii loo yiqiin Xabashi.

**FG:** *Waxaa xusid mudan in markii Burtiqeysku uu soo gaaray xeebaha Badda Cas Q.16aad wuxuu u aqriyey magacii Al- Xabasha: ABISIINIA, sidaas awgeed wixii ka danbeeyey waqtigaas (waa casrigii Dagaalkii Axmed Gurey) saddexdaan magac: Itoobiya, Xabashi iyo Abisinia waxay ku soo hareen dalka maanta loo yaqaan Ethiopia oo magaalo madaxdiisa ay tahay Addis Ababa.*

## Xigasho:


1. Will Diurant: History of Civilization Vol.1aad. (Ethiopia).
2. Mumtaaz al Carif: Al Xabasha (min Ma'rib ilaa Axium).
3. Asaga.
4. Will D. History of Civilization.
5. Waxaa daabacay maktaba al – Nahdah 1955 (Qaahira).
6. Mumtaaz al Carif: Al Xabasha.
7. Sida: Carab faqiih: Futuux Al Xabasha.
8. IBN AL ATHIIR: Al Kaamil Fii Al Taariikh.
9. Asaga.
10. Mumtaaz al Carif: Al Xabasha.
11. IBN Xowqal.
12. ATLASKA taariikhda ee Caalamka Islaamka Daar Al Fikri Al Carabi.
13. 13,14,15 arimo caan ku ah taariikhda Soomaaliyeed ee aan qorneyn.

16 . Dr Rajab Max'ed Cabdi xaliim: xiriirka siyaasadeed ee muslimiintii Zeylac iyo Misiixiyiintii Xabashida; Daarta Zeylac: Muqsidho 2014ka.

# Taariikhda Ciidanka Badda:

## Qaybtii Labaad

W.D. ADM GAAS FAARAX A. CUMAR

Waxaan ku soo sheegnay maqaalkii kowaad in ciidanka badda Soomaaliyeed la aasaasay 1950kii markii Talyaanigu uu abuurayey Ciidan Soomaaliyeed (Bolis iyo Milatari), waxay tiradiisu ahayd 40 badmaax, waxaana lagu magacaabi jiray Bolatone della Marina Milatare (Kooxda C.Badda). Howsha kooxdaani waxay ahayd maamulidda dekedaha, waxayna hoos imaan jirtay kolba wasaaraddii dekeduhu hoos yimaadaan ilaa Dec 1964kii oy kooxdii ku soo biirtay Wasaaradda Gaashaandhigga (X.D.S). Kooxdu waxay ka qayb gashay dagaalkii 1964kii oo waxay u xilsaarnayd wadidda doomanka ka gudbiya wabiga ciidanka iyo saadkiisa, gaar ahaan aagga Doolow.

Kooxdaan markii lagu soo wareejiyey X.D.S waxay lahayd HAL DHAMME (Khaliif Macow Xasan) iyo laba 2/xle (Max'ed Cismaan Xalane iyo Jeylaani Max'ed Nuur), waxayna kooxdu la wareegtay labadii markab ee nooga timid M.Sofiyet, soona gaartay Dekedda Berbera 10/2/1965tii, taariikhdaas oo loo aqoonsaday Maalinta C.BADDA Soomaaliyeed. Waxaa kale oon ku soo xusnay maqaalkii 1aad in 17sarkaal oo wax ku soo baratay Alixandaria (Masar) ay dalka soo gaareen 1965kii, waxaana ka mid ahaa X/le (Admiral) Max'ed Cumar Cismaan Taliyihii C.BADDA ee 1977-1981, 1984-86, iyo x/le Saciid Marino (Admiral)
oo noqday Taliyihii C.BADDA 1987-1990kii.

**Maqaalka 2aad**

Maraakiibta imaaneysay waxay ahayd 6(lix) markab oo ah nooca xeeb – ilaaliyaha ah (XIL); sidaas awgeed waxaa loo baahnaa saraakiil leh takhasusyo kala duduwan iyo badmaaxiin leh farsamooyinka heer dhexe; sida badmaridda (Navigation), Machanic, Isgaarsiin, Radar …IWM, oo ka shaqeysa maraakiibta iyo baraha isgaarsiinta iyo sahanka ee xeebaha. Sidaas awgeed waxaa Masar loo diray 1964tii 4 sarkaal oo ah badmarayaal, waxayna dalka ku soo noqdeen 1967dii, waxayna kala ahaayeen:-

1. X/le Muuse Saciid Max'ed (G)
2. X/le Cismaan Jibriil Xagar
3. X/le Aadan Kowti (G)
4. X/le kale

Sidoo kale waxaa 1965tii loo diray M.Sofiyet, Magaalada Booti (Poti) ee Badda Madow; koox ahayd S/xigeen iyo badmaaxiin si ay u soo bartaan farsamada dhexe, muddo sanad waxbarasho ah; waxayna dalka kusoo noqdeen 1966dii, waxaana loo kala qeybshay maraakiibtii oo dalka soo wada gaartay iyo Barihii ilaalada xeebaha (BIB).

Waxaa kale oo loo diray M.Sofiyet isla 1965tii, waxna ku bartay Magaalada Baku (Magaalo madaxda Azerbayaan) 3(saddex) sarkaal oo ah heer Injineer Navigation (5sano) waxayna dalka kusoo noqdeen 1970kii; waxayna kala ahaayeen:-

1. 2X/le (Inj) Axmed Xaaji Cumar (G)
2. 2X/le (Inj) Mowliid Xasan Faarax (G)
3. L/S la oran jiray HURRE (G) oo la soo celiyey 1967dii, markii uu diiday inuu ka qeybgalo duruusta shuucinimada uu ku sheegay iney ka soo horjeedo Islaamka uu aaminsan yahay.
4. Sidoo kale waxaa loo diray M.Sofiyet isla 1965tii 6 L/S oo heer Injineer ah waxayna wax ku barteen magaalada Liningaraad, waxayna dalka ku soo noqdeen 1970kii; waxayna kala ahaayeen:-
5. 2xlle Inj Faarax Gurxan Cali (Matoriste)
6. 2x/le Ing Cabdi Yuusuf (Matoriste)
7. 2x/le Ing Cabdi Eelaay (Raadar)
8. 2x/le Ing Cab/hi Max'ed Cabdi "Farabadne" (Raadar)
9. 2x/le Ing Cumar Nuur Max'ed (Radio)
10. 2x/le Ing Cabdullaahi Ilfuur (Radio)




**Midig Gadaale Saraakiisha:**

1-Inj. Cabdi Yuusuf 4- Inj. Cumar Nuur
2- Inj. Axmed Xaaji 5- Shafeec Xirsi Cumar
3- Inj. Cabdi Eelaay 6- Muuse Saciid
Safka hoose waxan kuso xusnay Maqaal L.1

Waxaa kale oo loo diray M.Sofiyeed 1966kii, waxna ku soo bartay magaalada BAKU, dalkana ku soo noqdeen 1968kii, 10 L/S oo soo baranaayey Difaaca Xeebaha (Coastal Guard); waxayna kala ahaayeen, ayagoo isugu xiga sida Darajada qalin jebintu ahayd:-

1. Xlle Faarax Axmed Cumar (QORAHA).
2. X/le Cab/hi Cali Nuur (G)
3. X/le Max'ed Max'ud Saacid (G)
4. X/le Xuseen Macallin Daahir (G)
5. X/le Axmed Max'ed Ciise "Dhala cadde"
6. X/le Max'ud Sh. Yuusuf (G)
7. X/le Muuse Ciise Waaberi (G)
8. X/le Cab/hi Cali Cigaal (G)
9. X/le Cab/hi Cabdi Yuusuf (G)
10. X/le Max'ed Bootaan Cawl

Tobankeennii waxaa na loo kala baddelay XAMAR iyo BARBARA, ayadoo loo kala magacaabay taliyaha D.Xeebaha ee Xamar Xle Faarax Axmed, taliyaha Barbarana X/le Cab/hi Cali Nuur; taliye x.g. Xamar X/le Saciid, taliye x.g. Barbara x/le Xuseen M. Daahir,

waa sida loo kala helay Darajada Qalinjebinta. Waxaa nagu guruub ah (1966) Shafeec Xirsi Cumar (SAAD: ODESA).




**<u>Saraakiishii Difaaca Xeebaha ee 1966dii:</u>**
**Midig taagan:**
1- Cab/hi Cali Nuur 5- Axmed Dhala Cadde
2- Macallimadii Afka 6- **Midig <u>Fadhi:</u>** Faarax (Qoraha)
3- Max'ud Sh. Yuusuf 7- Cab/hi Cali Cigaal
4- Xuseen Macallin Daahir 8- Max'ed Bootaan Cowl

1967dii waxaa loo diray M.Sofiyet 2L/S oo la baray Difaaca Xeebaha waxayna kala ahaayeen: Max'ed Xasan Axmed (G) iyo Muuse Cumar Cali (G); waxayna soo noqdeen 1969kii.

Laga billaabo 1965 ilaa Kacaankii 21/10/1969kii; C.BADDU wuxuu dhisay:-

1. 3 Saldhig oo kala ah: Muqdisho, Berbera iyo Kismaayo.
2. 13 Bar ilaalo (BIB) oo lagu dhisay: Seylac, Bulxaar, Berbera, Boosaaso, Caluula, Hobyo, Cadale, Muqdisho, Marka, Baraawe, Kismaayo, Buurgaawo iyo Raas Kiyaanbooni.
3. Hal Dugsi farsamo oo ku yiil Xamar
4. 6 Markab (XIL) oo lagu kala qeybiyey 3da Saldhig.
5. 2 Horin Madaafiicda Xeebta oo ilaalisa Dekedaha Muqdisho iyo Berbera.

**<u>F.G:</u>** Bar Ilaalo kasta waxay ku qalabeysneyd:-

2 Radio HF, 1 Radar (Distance = 100 NM).

1-2 gaari, Qalabka Hawada lagu cabiro iyo 30 badmaax.



**Fadhiya Midig:** 4-Taliye: Max’ud Geele
1-Ing. Cabdi Eelaay 5-Cab/dir Kheyre
2-Faarax (Qoraha) 6-Ing. Cumar Nuur
3-Cabdir Cadde Muunye




**Midig taagan:**
1- Muuse Ciise Waaberi 2- Faarax (Qoraha)
3- Inj. Cab/hi Farabadane 4- Aadan Waqaf(1967dii)
**Midig fadhiya:** 1-Yuusuf Malaaq, 2- Xuseen Macalin Dahir
3- Cab/hi Cali Cigaale.



*Waa hubkii iyo qalabkii difaaca xeebaha oy ka shaqeyn jireen saraakiisha (Dufcadii) 1966dii uu horjooge u ahaa X/le Faarax (Qoraha).*



**Midig:**

1-Axmed Daala-Cadde 3- Faarax (Qoraha)

2- Max'ed Xasan Axmed 4- Max'ed Bootaan Coowl

# Qeybtii $^{2aad}$ ee Qaanuunka Badda Soomaaliyeed

**W.Q. ADM GAAS Prof Faarax Axmed Cumar (Faarax Qare)**

Qaanuunkaani waa midka rasmiga ee Badda ee dawladda somaaliya wuxuna soo baxay 1989kii waxaana la waafajiyay heshiiska (Qaanuunka) badda ee caalamiga (UNCLOS) ee soo baxay 10 dec 1982, Dowladda Soomaaliyana ay ka mid tahay saxiixayaashiisa, Baarlmaankii Soomaaliyeedna ogalaaday, Madaxweyne Maxamed Siyaadna uu ku soo saaray Decree 9/2/1989.

Sharcigan Badda ee dalka waxaan kasoo qaadanaeynaa macluumad guud ee u gaar ah kuna saabsan Badda Dalka.

1- **Xarriiqinta Asaasiga:** waa halka ay gaaraan biyaha baddu markii hirku gadaal u noqdo, waa hadii ay xeebtu ay toosan tahay. Hadii kale waxaa loo qaadanayaa xarriiqinta asaasiga xariiqmo toosan oo xariiriya raasaska (madxaha) xeebta (dhulka badda gala). (Q. 4$^{aad}$, F.1$^{aad}$), Q. 5,14,16 ee UNCLOS.
2- **Biyaha Gudaha:** waa biyaha badda, laashashka, wabiyada badda ku darmada, dekedaha, kuna dhaca xaga dambe ee xiga berriga ee xariiqinta asaasiga (Q.5$^{aad}$) Q8$^{aad}$ ee UNCLOS).
3- **Biyaha Qaranka (**territorial water), ballacoodu waa 12 M.B. (Miil Badeed = N.M. Neutical mile) = 22 KM oo ka billaabata xarriiqinta asaasiga, (Q. 4$^{aad,}$ F 3$^{aad}$), Q.3 ee UNCLOS.

**F.G.** Biyaha gudaha iyo Biyaha Qaranka Dowlada Soomaaliyeed waxay ku leedahay awood buuxda: Hawadeeda, Biyaheeda iyo Biyaha hoostooda iyo Dulka ka sii hooseeya (Q. 4$^{aad}$ F. 4$^{aad}$).

4- **Biyaha Xiga:** (Contiguous Zone), waa ballac ah 12 M.B., wuxuuna gaarayaa ilaa 24 M.B oo ka billaabata xarriiqinta asaasiga ah (Q. 6$^{aad}$, F. 4$^{aad}$), Q. 9$^{aad}$ ee UNCLOS

J. Soomaaliya waxay kontarool iyo fulin ku sameyneysaa shuruucda canshuuraha, socdaalka, ka hortagidda wasakheynta iyo caafimaadka (Q. 6$^{aad}$), Q. 33$^{aad}$ ee UNCLOS.

5- **Qeybta dhaqaalaha ee gaarka ah: EEZ (Exclusive Economic Zone)**. Waxay gaareysaa ilaa 200 M.B. oo ka soo bilaawata xariiqinta asaasiga ah (Q. 7$^{aad}$, F. 1$^{aad}$), Q. 55-65, 87-115 ee UNCLOS. J Soomaaliya waxay xuquuq buuxda ku leedahay EEZ keeda kheyraadka nool iyo kan aan nooleyn ee biyaha, biyaha hoostooda iyo ka sii hoos (Q. 7$^{aad}$, F. 2$^{aad}$).
6- **Dagaandegga Hoose (Continental Shelf):** wuxuu balac ahaan gaari karaa ilaa 350 M.B. **oo** ka billaabata xarriiqinta asaasiga. Q 76-85 ee UNCLOS. J. Soomaaliya waxay xuquuq buuxda ay ku leedahay ka faa'ideysiga dhammaan kheyraadka badda nool iyo kan aan nooleyn ee degaandeggeeda badda (Q. 8$^{aad}$, F. 1,2$^{aad}$).

7- **Jasiiradaha ku yaal Xeebaha:** haddii ay ku yaalaan meelo aan ka fogeyn xeebta 12 M.B waxay yeelanayaan Biyo Qaran (territorial water). Waxayna ka billaabaneysaa xariiqinta asaaska ah ee jasiiradda kuna dhacda dhinaca badda. Q. 13[aad] ee UNCLOS.

8- **Dhul badeedka ku yaala xagga barriga ee xeebta:** wuxuu ka tirsan yahay badda, dhumuc ahaan= 450 (afar boqol iyo kontan) mitir oo ku dhirirsan xeebta (Q.10[aad],) maamulkii-sana waxaa leh Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha: (Q.11[aad]).

9- **Kheyraadka badda kuwooda nool (Kalluun):** waxaa loo baahan yahay in si aqligal ah loogu faa'ideysto, lana tilmaamo inta ugu badan ee laga guran karo nooc kasta si loo ilaaliyo inaysan dabar go'in, gaar ahaan kuwa nuujiya ilmahooda, qubada I.W.M. (Q.61[aad] – Q69[aad] ee UNCLOS).

10- **Xuduudaha Badeed ee laba Dowladood oo Daris ah isku hayaan sida:** Soomaaliya iyo Kenya. Waa xarriiq toosan oo aadeysa xaga badda oo labada dhinac wax u simeysa, Q.15[aad] ee UNCLOS; waxaana lagama maarmaan ah in Dowlad kasta ku qorto xudduudeeda badeed (Qaab Coordinate ah) una gudbiso Xoghayaha Guud ee Q.M. si loo wada ogeysiiyo Dowladaha Caalamka, Q.16[aad] ee UNCLUS. Hadii labada Dowlad ay isku soo horjeedaan, biyaha u dhaxeeyana aysan gaareyn 400 M.B., sida gacanka cadmeed ee u dhaxeeya Yamen iyo Somalia, xuduudda labada Dowladood waxay noqoneysaa xariiqin wax u simeysa oo marta dhexbertanka badda u dhexeysa. Laba Dowladood. (Isla Qodobkii hore). Hadii labada Dowladood ay ku heshiin wayaan xuduuddooda waxaa u go'aaminaya maxkamadda caalamiga ah; sida hadda u socota Soomaaliaya iyo Kenya.

11- **Qaanuunkeenna baddu:** wuxuu nidaamiyaa badmaridda maraakiibta, dadka iyo badeecada saran iyo wixii dhibaato ah oo ka imaan kara iyo xadkooda sidoo kale dekedaha iyo maamulkooda. (Buugga 1aad – Buugga 5aad ee Qaanuunka Badda).

12- **Wasakheynta Badda:** ayuu Qaanuunku ka hadlay iyo sida looga hortegi karo (Buugga 6aad).

13- **Maamulka Badaha Dalka:** waxaa iska leh Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha ee J.F.S, (Buugga 2aad).

# Islaamka & Xuquuqda Haweenka iyo Carruurta

W/D: Maxamed Xasan Maxamed

Waxaa mahad is kaleh Allaha abuuray Caalamka maamulane, naxariis iyo nabad galyo Rasuulkeena korkiisa Allahaa yeelo.

Intaa ka dib waxaa ogsoonnahay in Islaamku uu u soo dagay inuu hagaajiyo caqiidada iyo dhaqanka dadka, waxuuna siiyay cid kasta oo ka mid ah dadka (lab & dhadig) xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa.
Islaamka ka hor dadku waxey ahaayeen kuwa is dulmiya, dulmigaasna waxuu intiisa badan ku dhacaayay dumarka iyo caruurta, waxaana ka mid ahaa dulmiga lagu hayay haweenka iyo caruurta waxyaalahan soo socda:-

1. waxaa la'aasi jiray caruurta aygoo yar yar gaar ahaan gabdhaha, waxeyna aamin sanaayeen in gabdhu ay sharaf darro mooyee wax
   tar kale eysan laheen, ilaaheeyna waxuu ku tilmaamay arinkaas suuradda Al-Naxli aayadaha(58,59):

" Marka loogu bishaareeyo mid kood dhedig(gabar) wuxuu noqodaa wajigiisu madow

walbahaarsan, wuxuuna iska qariyaa dadka xumida waxa loogu

bishaareeyay awgeed , miyuu kuhaystaa dullinimo,mise wuxuu ku duuga dhulka" )[(1)].

2. ninka waxa uu guursan jiray inta uu doono oo dumar ah furi jirayna sabab la'aan,waxaana Islaamku ku soo koobay afar kaliya, waa haddi loo cadaalad fali karom haddii kale waxaa la amray hal xaas oo kaliya[(2)].

3. haweenku waxey ahaayeen kuwa aan la siinin xuquuqda eey leeyihiin sida: dhaxalka meherka iyo kuwa kalaba[(3)]

4. Waxey ahaan jirtay haweeneydu mid la'iska dhaxlo oo laga mid dhigo waxyaalaha la dhaxlo, waxaana u tartami jiray caruurta uu dhalay ninkeeda, hadeey doonaanna wey guursan jireen hadii kalena wey iska heysan jiree[(4)].

5. Waxaa lagu guursan jiray qaabab aan wanaagsaneyn sida ayadoo laga sineysto marka hore ka dibna mark ay uur qaado la guri geeyo[(5)].

Dhamaan dulmigaas iyo kuwa kale oo ka xun ayadoo ey jirto, ayuu islaamku soo dagay, waxuuna mid mid u reebay dulmigaas ilaa uu baabi'iyay gabi ahaan.

Islaamka waxuu siiyay dumarka xuquuq waxuuna saaray waajibaad la mid ah kan ragga.

Xuquuqda haweenka ee uu islaamku siiyay waxaan u kala qaadeynaa xuquuqda rayidka ah iyo xuuquuqda siyaasadeed.

**<u>Xuquuqda Rayidka Ah</u>**

**1) Xaqqa lahaanshaha**:

Islaamku waxuu sugay in haweeneydu xaq u leedahay in ay wax lahaan karto, haday ahaan laheyd hantida guurtada ama mida ma guurtada ah, siyaabaha ay hanti ku lahaan kartana waxaa ka mid ah : shaqada, dhaxalka, meherka iyo ganacsiga,arintaasna waxay kala mid tahay gabadhu wiilka. waxuuna jideeyay islaamku sharcigii lagu ilaalin lahaa lahaanshaha, oo waxuu diiday ku xad gudubka hantida dadka, waxuuna dul saaray ciqaab ruuxa sameeya xad gudub.

Waxaa markhaati ugu filan in ay haweeneydu wax lahaan karto sida ku sugan xadiis darajadiisu wanaagsan tahay oo uu warinaayo Imamu Al-Bukhaari kaasoo ah: " xaaskii Abdullahi Ibnu Mascuud ayaa u timid rasuulka (NNKH) kuna tiri waxaad amartay maanta in wax la sadaqeeyo anigana waxaan leeyahay Dahab, waxaan doonay inaan sadaqeysto, waxuuna Ibnu Mascuud i leeyahay aniga iyo caruurteyda ayaa uga xaqnimo badan inaad dad kale ku sadaqeysato, markaaas ayuu rasuulka (NNKH) ku yiri: run buu sheegay Ibnu Mascuud ee ninkaaga iyo caruurtaada ayaa ugu xaq nimo badan inaad ku sadaqeeysato:".

Marka saxaabiyadaasi waxeey rumeysnayd in ay hantidan ayadu leeydahay, xaqna u leedahay in ay u adeegsato sida ay rabto oo sharciga waa faqsan

**2) Xaqqa shaqada:**

Ugu horeyn waxaa xusid mudan in islaamku uu ku qasbin dumarka in ay shaqeeyaan, si ay u masruufaan naftooda iyo dadka kaleba, balse raga ayuu taa badalkeeda ku qasbay in ay shaqeeyaan si ay u masruufaan naftooda iyo dadka ay mas'uulka ka yihiin.

Ayadoo ay jirto arinkaas ayuu Islaamku u ogol yahay dumarka in ay shaqeystaan, kana shaqeyn karaan bulshada dhexdeeda iyo shaqooyinka ay uga baahantahay dowladda ayadoo la dhowraayo anshaxa islaamka. waxaana tusaale inooga filan sida Ilaaheey sareeyee ku xusay suuradda Al-Nisaa aayadda (32aad) taas oo dhaheysa " Raga waxaa u sugnaday qeyb waxa ay kasbadaan, haweenkuna

waxaa u sugnaaday qeyb waxa ay kasbadaan ah". Macnaha guud ee aayadda waxaan ka fahmeynaa in ay haweeneydu xaq u leedahay in ay shaqeyso si ay hanti u kasbato.

### 3) Xaqqa Dhaxalka:

sida aan horay u soo xusnay haweenku wax ay ahaayeen kuwa aan wax dhaxlin balse la'iska dhaxlo, kana mid ah hantida laga dhaxlaayo nimankooda, waxeyna diinteyna Islaamka u sugtay haweenka in ay ku leeyihiin dhaxalka xaq la yaqaan oo aan qofna duudsiin karin, waxaana Alle koreeye u soo dajiyay arinkaas Ayaad ka hadleysa dhaxalka oo kaliya, tilmaamtayna qof kasta waxa uu ku leeyahay dhaxalka.
waxaana la sheegaa in aayadda dhaxalka ku soo dagtay, haweeneey uu ka dhintay saxaabiga Sacad Ibnu Rabiicah, oo rasuulka u sheektay in Sacad ka tagay labo gabdhood, adeerkoodana qaatay hantidooda waxna uusan uga tagin. Rasuulku NNKH waxuu ku yiri: "Alle ayaa xukmin doono arinkaas" markaas ayuu Ilaaheey soo dajiyay aayadaha dhaxalka. Sida ka muuqata xadiiska adeerku wuxuu ku dhaqmay dhaqanki jiray islaamka ka hor oo ahaa inaan wax la dhaxalsiin dumarka, balse uu arinkaas ka hortagay Islaamku.

Lasoco qaybta labaad ee maqaalka oo aan kuugu soo gudbin doona cadadka 3aad ee majalladaan wuxuuna noqon doona Xuquuqda ka dhexeysa labada isqabta dabadeedna tan caruurta.

**<u>Xigasho:</u>**

([1]) Tafsiirka Macanida Quraanka ee ku qoran luqadda Soomaaliga
([2]) eeg Suuratu al-Nisa Aayadda 3aad
([3]) eeg isla Suuradda al-Nisa ayah 7aad
([4]) eeg Suuradda al-Nisa ayadaha 19aad, 22aad
([5]) sida ku cad Xadiiska cai'sha ee uu wariyay bukhaari.

# Kheyraadka Dhaqaale ee Badaha Soomaaliya

Qorre: Ahmed Bashiir Mohamed Ali



Sanadihii badnaa ee dagaalka sokeeye iyo Dowlad la'aanta Soomaaliya waxay na badday in aan awoodi weyno inaan sugno nabadgalyada badaheena, kana faa'ideysanno kheyraadka dhaqaalle ee ku jira, Hayeeshee waxaa mudnaan leh marka hore in la ogaado kheyraadka dhaqaalle ee badaheenna laga heli karo.

**Kheyraadka Dhaqaale ee badaheenna waxuu u kala qaadmayaa sidan:-**

- Kheyraadka Nool sida: Kalluunka, Ayax Baddeedka (Crusta Ocean), Basaliga, (Mollusks) iyo Algae.
- Kheyraadka ma Noolaha ah sida: Macadanta, Shidaal: Batrool, Gaas &
- Tamarta laga dhalin karo dhaqdhaqaaqa badda.
- Dhismaha Dekedaha (Port Infrastructure).
- Dhul Xeebeedka (Coastal Laned).
- Gaadiidka Badda (Maritime Fleet).
- Ganacsiga (Business and Trade).
- Dalxiis (Tourism).

**Haddaan Falanqeyno Qodobada kor ku xusan waa sidan:-**

1- Kheyraadka nool ee Baddeena ku jira waxaa ugu muhimsan uguna baaxad weyn Kalluunka. Waxaa la qiyaasayaa in uu jiro xaddi aad u ballaaran oo kayd kalluun ah, oo Baddeena ku jira, Mudadii burburka waxaa la soo gudboonaatay badaheenna xaalufin oo maraakiib iyo doonyo shisheeye ay si sharci daro ah u guranayeen, muddo 24sano ah, maadaama uusan jirin Ciidanka Badaha Soomaaliyeed ilaalin jiray.

2- Kheyraadka ma noolaha ah: sida macdanta iyo shidaalka, walina lama hayo tira koob cad oy muujinaya baaritaano dhab ah oo la sameyey, si kasto oo arinku yahay waxaa hubaal ah in baddeenna uu ku jiro kayd baaxad leh oo isugu jira shidaal iyo macdan.

Dekadaha: Dalku wuxuu leeyahay afar dekedood oo shaqeysa welina u baahan hormarin dib u qaabeyn, waana: Dekedaha Muqdisho, Berbera, Kismaayo iyo Bosaso iyo dekado macmal ah sida Ceel-Macaan, Marka, Baraawe, Buurgaabo, Xaabo IWM. Adeegsiga dekedahan macmalka ah oo ay dantu khasabtay ayay muwaadiniinta Soomaaliyeed kala kulmaan khatar ku timaada naftooda iyo maalkooda. Runtii nolosha dadka Soomaaliyeed waxay ku taagan tahay adeegga dekedahan.

3- Gaadiidka Badda: Soomaaliya hadda malahan gaadiid badeed oo ka howl gasha isku xirka dekedaha dalka iyo kuwa caalamka; waanse lahaan jirnay.

4- Ganacsiga (Business and Trade); Waxaa jira ganacsi aad u baaxad wayn oo ka jira Dekedaheena iyo caalamka, kaasoo ah soodajin iyo dhoofin. In kabadan 90% ganacsigeena waa soo dajin (Import) oo badeecado nooc walba ah. Dhoofinta waxay ka kooban tahay dhoofinta xoolaha iyo dalagyada beeraha (Sisin & Liin), iyo xabagta luubaanta (maydiga).

5- Xoogga hantida iyo muruq maalka (Human Capital Resource); waxaa awooda hantiyeed iyo midda bini adan ee muruq maalka ah ee ku hawlan soo saarista kheyraadka badaheenna, waa la ballaarin karaa waxayna sugeysaa horumarin.

6- Deegaan Badeedku; waa dhulka xeebta ah ilaa 450m oo ay masuul ka tahay Wasaaradda Dekedaha iyo G. Badda. cidna si gaar ah uma yeelan karto, waxaana kasoo geli kara dakhli aad u weyn, haddii la nidaamiyo maamulkiisa.

7- Dalxiiska (Tourism); haddii xeebaheenna iyo deegaan badeedkeena sida xeebaha, Jasiiradaha Laashashka ay helaan maal galin lagana shaqeeyo, waxay soo jiidin karaan malaayiin dalxiisayaal ah, oo dalka timaada soona gelin karto lacag adag oo xoog leh.

8- Tamarta la Cusboonaysiin karo ee aan dhamaanayn (Renewable Energy); sida tamarta dabaysha, xeebaha iyo dhaqdhaqaaqa badda: hirka iyo qulqulka taasoo haddii ay maalgalin hesho dabooli karta baahida Tamarta dalka ama qayb weyn.

Tirada Maraakiibta soo gasha dekadaha Soomaaliya waxaa lagu qiyaasaa lix iyo toban (16) Markab. qiyaas ahaan, waxayna kala yihiin sidan:

- Dekadda Muqdisho 6 markab
- Dekadda Berbera 5 markab
- Dekadda Kismaayo 3 markab
- Dekadda Bosaaso 2 markab

Waxaa laga soo dajiyaa dhammaan badeecadaha daruuriga ah iyo kuwa kale sida: waxa la isku qurxiyo, electarooniga; Waxaana laga dhoofiyaa xoolaha nool, Hilibka, Liinta, Maqaarka Sisinta iyo Beeyada. Qiima ahaana waa 10% ganacsiga dibadda.

- Dakhliga ka soo gala dekadaha wali ma cadda mana cayina, laakiin Dekadda Muqdisho, shirkada Turkiga ah ee dekadda ka hawl gasha waxay sheegtay in bishii Febraayo 2015ka ay dawladda dhexe ku wareejisay $ 1,582,000 oo dakhliga dekadda oo ah 55% qoondadii dowlada Soomaliyeed lahayd, sida lagu heshiiyey). Waana horumar dhab ah.

**Wax soo saarka Kallunka Dalkeena:**

Iskaashatooyinka ka hawl gala xeeebaha Banaadir iyo Shabeelooyinka qaarkood sida:

1. **Dan kulmis**: xeebata Gobolka Banadir, Iskaashatadan waxay soo saartaa maalintiiba 10 tan oo kalluun ah.
2. **Alla- Aamin**: xeebaha Gobolka Banaadir, waxay soo saartaa maalintiiba 10 tan oo kalluun ah.
3. **Dalmar:** Xeebta Deegaanka Jasiira, ee G/ Sh/ Hoose, wax soo saar kooduna waxaa lagu qiyaasay maalintiiba 20 ten celcelis ahaan.
4. **Durdur:** Xeebta Ceel Macaan ayey ka howl gashaa, waxayna soo saartaa celcelis ahaan maalintiiba 10 tan oo kalluun ah qiyaas ahaan.

**Reference:-**

Somali maritime resource and security strategy September 2013.

Sharciga Badaha Soomaaliyeed January 1989.

Turkish Al-Bayrak group, Feb.2015

# Iskaashatooyinka Kaluumeeysiga Gobalka Banaadir & Shabeellooyinka iyo Wax Soo Saarkooda

W.D. Eng. Cabaas Nuur Mahdi



Qalabka Kaluumeysiga

Soomaaliya waxay leedahay xeebta ugu dheer Afrika, waxaana dhex ceegaaga badeeda kheyraad kala duwan, hadaba Gobolka Banaadir iyo Shabeelooyinka waxaa ka howl galaan iskaashatooyin ku howlan wax soo saarka kalluunka.

Iskaashatooyinku waxay maalin walba ku dadaalaan ineey shacabka Soomaaliyeed siiyaan kalluun tayadiisu sareyso oo kala duwan, wax tarna u leh jirka bani'aadamka

Iskaashatooyinka kulluunka ku howlan wax soo saarka Gobalka Banaadir iyo Shabeelooyinka:

1. **Dan kulmis:** waa iskaashato soo saarta
   Kalluunka kana howl gasha Degmada Cabdi Casiiis ee Gobolka Banaadir.
2. **Alla Aamin:** waa iskaashato soo saarta kalluunka kana howl gasha Degmada Xamar Weyne ee Gobolka Banaadir.
3. **Dalmar:** waa iskaashato soo saarta kalluunka kana howl gasha Deegaanka Jasiiira ee Shabeelaha Hoose.
4. **Dur Dur:** waa iskaashato soo saarto kaluunka kana howl gasha Xeebta Ceel-Macaan ee Sh.Dhexe

Dhammaan Iskaashatooyinka aan kor ku soo xusnay waa kuwo u adeega bulshada gaar ahaan wax soo saarka kalluunka. Waxaa xusid mudan in maalmaha Jimcaha inay Iskaashatooyinka qaarkood ay ka shaqeeyaan badbaadinta caruurta iyo dadka aan dabaasha aqoonin, maxaa yeelay maalamahaa waa kuwa ugu mashquulka badan dhammaan xeebaha, waxaana yimaada bulsho iskugu jirto kuwa dabaal yaqaanan iyo kuwa aan aqoonin, waxeyna u baahan yihiin badbaado iyo ilaalin, hadii aan loo diyaarin doomo iyo jaakadaha badbaadada waxaa dhici karta iney timaado dhimasho iyo harqasho, sidaa darteed iskaashatooyinka kalluumeysiga si wanaagsan ayey ugu shaqeeyaan bulshada u damaashaad takta xeebaha Caasimadda.

**<u>Dhibaatooyinka heysta Iskaashatooyinka Kalluumeysiga:</u>**

Wax soo saarka kalluumeysiga sanadahan danbe wuu ka roon yahay sanadahii ka horeeyay maxaa yeelay waxaa jiray xilli kalluumeysatada badda markii ay galaan ay waxba ka soo qaban jirin xitaa hal kalluun iskaba daa wax kala, sababahan awgood:-

1. Qalabka oo duug ah
2. Tababar la'aan
3. Suuqgeynta oon sahlaneyn
4. Awooda badbaadinta badda oon jirin oy noloshooda iyo nolasha caruurtooda ay ku maareeyaan.

Taas waxaa ugu wacanaa maraakiibta sida sharci darrada uga kalluumeysta badaha Soomaaliya oo sii badaneysay isla markaasna isticmaaleysay shabaagado aan dhaafeyn xitaa dhirta uu cunno hooygana u ah kalluunka (Phytoplankton), taas oo keeyneysa kalluunka ka

hara maraakibtaas jariifka ah uu waayo cuno iyo hooy kuna kalifeysa inuu ka guuro xeebaha Soomaaliya.

Iskaashatooyinka & kallumeysatadda waxey isticmaalaan Qalabkii la'isticmaali jiray mudo hore oo laga soo tagay wax soo saarkiisana ay yar tahay, taas waxaa raaca iskaashatooyinka kalluumeysiga ma helaan taba baro kor loogu qaado aqoontooda xirfadeed iyo dhibaatooyinka ku dhici kara xiliyada ay ku guda jiraan wax soo saarka.

Badaha adduunka mar waliba waxaa ka dhaca shilal aad u waaweyn oo lama filaan ah, balse waxa ay leeyihiin kooxo u tababaran ka hortaga shilalka ka dhaca badaha (Rescue Team Protection) waxayna wataan qalab kala duwan oo ay ka mid yihiin, Doonyo aad u dheereeya

Helekobtaro (Helicopters), Doonyo balaastik ah iyo maraakiib oo ku qalabaysan, life jackets, iyo life rafs kuwaas oo badbaadin kara dad badan oo ku harqanaya badda gudaheeda.

Hadaba si looga hortago shilalka iyo waxyaalaha lama filaanka ah ee ka dhacaya xeebaha badaheena, waxaa ay Hey'adda Cilmibarista Badaha Soomaaliyeed rajeynaysaa iney furto tababaro kor loogu qaadayo aqoonta iskaashatooyinka kalluumeysiga.

Tababar kaa soo lagu abuurayo kooxaha ka hortaga shilalka badda ka dhaca, iyadoo lagala kaashan doono Dowlada Fadaraalka Soomaaliya iyo hey'adaha caalamiga ah iyo wasaaradaha aan wada shaqeyno si'aan iskaga wada kaashano badbadinta bulshadeena kaas oo ah waajib muqadis ah oo na saran



**Qalabka Wax Soo Saarka ee Iskaashatooyinka Kalluumeysiga:**

Iskaashatooyinka ka howl gala xeebaha Gobalka Banaadir waxay heystaan doonyo iyo qalabaka lagu jilaabto kalluunka oo kala duwan, xilli walba waxaa la helaa kalluun gaar ah waxaana loo isticmaalaa shabaagyo iyo qalab u gaar ah oo loogu tala galay, si

loogu soo qabto kalluunka, shabaagtaas waxaa loo qeybiyaa laba nooc:-

- Il weyn
- Il yar

Waxaana lagu qabtaa shabaagadahaas qaarkood Yaxaaaska, Kalluunka, Aargoosatada, IWM.

Cilimada waxaa lagu qabtaa kallunka yar yar oo lagu magacaabo Saafida oo aad u macaan.

Maalmahan oo kale kalluumeysatada aad ayey u faraxsan yihiin maxaa yeelay waxaa ay helayaan kalluun fara badan.

Afarta iskaashatooyin kalluumeysiga ee lagu magacaabo.

- Iskaashatada Kalluumeysiga ee **<u>DAN-KULMIS</u>**
- Iskaashatada Kalluumeysiga ee **<u>ALLA AAMIN</u>**
- Iskaashatada Kalluumeysiga ee **<u>DALMAR</u>**
- Iskaashatada Kalluumeysiga ee **<u>DUR DUR</u>**

Waxa ay aad ugu qanacsan yihiin dakhliga ka soo gala dhinaca wax-soo saarka kheyraadka baddeena, waxayna ku maareeyaan qoysaskooda.

Hadaba waqtigaan wuu kordhay wax soo saarka iskaashatooyinka kalluumeysiga celcelis ahaan waxay soo saaraan 60 Ton maalintii iyadoo ay ugu wacan tahay waqtiga kalluunka oo tiradiisa ay badan tahay suuqiisana uu fican yahay.

**Qalabka Wax Soo Saarka:**

Shabaqa ilweynta – 300mm

Shabaq ilyarta - 178mm

| No | Magaca Iskaashatada | Deegaanka Shaqada | W.S.S Ton - (10000 Kg) |
|---|---|---|---|
| 1. | DAN-KULMIS | XEEBAHA G/BANAADIR | 10 TON (celcelis) |
| 2. | ALLA-AAMIN | XEEBAHA G/BANAADIR | 10 TON (celcelis) |
| 3. | DALMAR | XEEBAHA JAZEERA | 20 TON (celcelis) |
| 4. | DURDUR | XEEBAHA CEEL-MACAAN | 20 TON (celcelis) |

Ilweynta waxaa lagu jilaabtaa Libaaxa halka ilyarta lagu jilaabto Kalluunka iyo Aargoosatada. Qalabka lagu jilaabto waxaa ka mid ah shabaagta nuucyadeeda kala duwan oo kala ah:-

- ✓ Cilimada: oo lagu farsameeyo wadanka gudahiisa waxaana lagu jilaabtaa kalluunka yar yar iyo Aargoosatada waxaana laga sameeyaa ulo iyo dun, waxayna leedahay albaab uu kalluunka ka galo laakiin uusan kasoo bixi karin.
- ✓ Milgo: waxaa uu ka mid yahay qalabka kalluumeysiga waxaana lagu jilaabtaa kalluunka yar yar iyo Aargoosatada waxaana laga sameeyaa dun dhumucdeedu aad u yar tahay oo sida badan dibadda laga keeno ayadoo diyaarsan.

**<u>Koobnaanta Wax soo Saarka (W.S.S) la Qiyaasay ee Maalintii:</u>**

- ✓ Wax soo saarka iskaashatooyinkaan waxaan ku muujineynaa shaxda hoos ku taal:
- ✓ Xarig iyo Jilib: qalabkan waa mid muddo dheer Dunida laga isticmaalayay ilaa iyo hadana waa la isticmaalaa.
- ✓ Dillo: waa qalab fudud oo raqiis ah marka loo barbardhigo kuwo kale ee kalluumeysiga waxaana loo isticmaalaa in lagu jilaabto kalluunka ku nool badda salkeeda, mar marna waxaa loo isticmaalaa kalluunka ku nool biyaha dhexe.
- ✓ Jeesto: waa hab lagu jilaabto libaaxa iyo tuunada, waxaana lagu farsameeyaa wadanka gudahiisa laakiin qalabka lagu sameeyo ayaa dibadda laga keenaa.

# Dhacdooyinka ugu Muhimsan Dal iyo Dibad ee Bilihii Dhawaa

**WD/ Cabdiraxiim Warsame Dirye**

## Muqdishu Dhaawicii Shalay iyo Dhagax Dhigga Maanta "Akademiye Goboleedka Af Soomaaliga"

**Faahfaahin Qaraxii ka dhacay Hotel SYL**

Waxaa weerar ismiidaamin ah lagu qaadey hotel SYL, waxaana la adeegsaday gaari walxaha qarxa laga soo buuxiyay, goobta hotelka waxay kasoo horjeedda Madaxtooyada.

wafdi ka socday Dowlada Turkiga ay ku sugnaa Hoteelka, kuwaasoo u gogol- xaarayay soo dhaweynta bar Madaxweynaha Turkiga kaasoo Muqdisho ku soo fool lahaa.

Wafdiga Turiga ayaa ka badbaadey qaraxaasi iyadoo sidoo kale war Dowlada ka soo baxay lagu sheegay in 2 askari ay ku dhinteen qaraxa, kuwaasoo ka mid ahaa ilaalada Hoteelka.

Sidoo kale waxaa ku dhintay ruuxii is qarxiyay kaasoo waday gaariga walxaha qarxa laga soo buuxiyay, dhacdadaan foosha xun, waxaa u xiran mas,uuliyiin amni oo maxkamad suge ah.





Waxaa adag in la sifeeyo murugada iyo uurku taalada uu ku reebay dadka Somaliyeed weerarkii ka dhacay Hotel Central ee Magaalada Muqdishu. Dhammaan dadkii qaraxa uu goobta ku qabsaday, kuwii arkaayay iyo kuwii maqlay intaba waxaa la soo gudboonaaday amakaag iyo anfariir uga yimid xoogga iyo qaabka qaraxaa loola tiigsaday dad Allah dartiis goob isku yimid si ay u gutaan waajibka salaadda jimca. Qaraxa ayaa galaaftay dad badan sababayna khasaara iskugu jirtay naf iyo mood.

Xubna ka socda Dawladda Somaliyeed oo ay wehliyaan dadwayne fara badan, ayaa ku mashquulsanaa gelinkii dambe ee shalay iyo aroornimadii maanta, aaska dadkii halkaa ku naf waayay iyo daabulaynta kuwii uu dhaawacu haleelay, si loogu daaweeyo gudaha dalka ama debeddiisa iyadoo la eegayo duruufta caafimaad ee gaarka ah.

Dadka geeriyooday ayaa iskugu jiray siyaasiyiin sarsare, madax hay'adaha Dawladd ee rayidka ah, ganacsato, da'yar ka tirsanayd ciidamada qalabka sidda ee Somaliyeed, xubna ka mid ahaa shaqaalihii hotelka iyo dadwayne kale.

Khasaaraarahaa baaxaddaas leh iyada oo uu la soo gudboonaaday dadka iyo dalka Somaliyeed, ayaa dhinaca kale, waxaa wax lagu naallooda ama lagu farxo ah in uusan hakin dhibkaa, higsiga dawladnimo ee ay madaxda iyo muwaadiniinta dalkeenna ka leeyihiin dib u taabba-gelinta iyo haab-haaba-shada qarannima, si dib loogu hanto sharafta iyo maamuuska ruuxa Somaliyeed.

Dhagax dhigga Akeedeemiyad Goboleedka Afka Somaliga ee Magaalada Muqdishu oo ay maanta si wada jir ah u wada dhagax-dhigeen Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Jabuuti Mudane Ismaaciil Cumar Geelle iyo dhiggiisa Madaxwaynaha Somaliya Mudane Hassan Sheikh Maxamuud. Ayaa ah tallaabadan shaki la'aan ka dhigayso, abuuraysana ifafaallo wanaagsan oo muujinaysa sida Dawladda iyo shacabka Somaliyeed ay uga go'antahay in ay wax qabsadaan iyaga oo kaashana Ilaahigooda, caqligooda, cududdoda iyo tan walaalaha iyo saaxiibada ay ku leeyihiin dunida kale.

Asaasidda academiyaddan ayaa la filayaa in lagu xaqiijiyo midaynta xiska, is-kaashi iyo iska-warqab, ay yeeshaan dadka ku hadla Afka Somaliga ee ku dhaqan wadamada Geeska Africa ee ay dunidu u taqaan: Somaliya, Jabuuti, Ethiopia, Kenya iyo dhammaan Jaaliyadaha afka Somaliga ku hadla ee ku kala nool daafaha dunida. Tallaabadan ayaa lagu doonayaa in lagu xaqiijiyo wixii lagu waayay rabitaankii dadka Somaliyeed ee soo jiitamayay mudada dheer oo ay ku doonayeen in ay helaan: hal dal, hal astaan calan, xudduud cayiman, hal caasimad, iyo hal nidaam talis.

Sidaa darteed waxay u muuqataa dhacdadii shalay iyo tan maanta sidii iyagoo ah, shar iyo khayr ku hadamaya joogid ama jiritaan, taa oo mid kastana uu ku doonaya loolankiisa in uu goobta u haro, guulna ku dambeeyo. Haddaba si khayrka uu u guulaysto shartana loo loodiyo, waxaan laga fursanayn amaba ah lagama maarmaan in uu khayrku helo garab iyo gacan taa oo ay u fidinayaan dawladda iyo dadwaynaha Somaliyeed, lab iyo dhiddig, curud iyo ciroole.

Khayrka waxaa lagu garab siin karaa in la qaado dardar-gelin lagu kordhinayo aqoonta iyo wacyiga da'yarta Somaliyeed rag iyo haween goobkasta iyo meelkasta oo ay ku nool yihiin. Aqoonta oo baahda, baridda iyo barashada caqiidda hufan oo la kordhiyo, abuurid wacyi sare iyo fursadaha waxbarasho iyo shaqo oo la baahiyo da'yartana loo simo, iyo in la ilaaliyo taakoor iyo qaf jaclaysi, ayaa hoos loogu dhigi karaa xagjirnimada da'yarteenna, laguna soo celin karaa dareen ay dadku wada qaataan oo ku aaddan in dalka la wada leeyahay dadkuna ay u siman yihiin waajibaadka iyo xuquuqda.

*Qore: Abukar Sheikh Abdi Ibrahim*
*Wasiir ku xigeenkii hore ee Wasaaradda Khorsheynta.*

**Shir looga hadlaayo xoojinta afka Soomaaliga oo Muqdsho ka furmay**

Waxaa Magaalada Muqdisho ka furmey shirweyne lagu xoojinaayo afka Soomaaliga. Shirkan oo socdey muddo saddex maalmood ah, waxaana lagu soo beegey iyada oo maanta caalamka laga xusaayo maalinta afka Hooyo ee 21 Feberaayo. Shirkana waxaa lagu qabtay Hotel City Palace.

Furitaankii shirka waxaa ka soo qaybgalay marti sharaf kala duwan. Madaxeynaha Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya MD. Xasan Shiikh Maxamuud waxaa uu munaasabadda ku casumey oo ka qayb-galay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti MD.Ismaaciil Cumar Geele oo 15-kii sano ee u danbeeyey awood geliyey hormarinta afka Soomaaliga, Sidoo kale waxaa ka soo qaybgalay madax ka socotey Gobolka ismaamulka Soomaali Galbeed ee dalka Itoobiya, iyo baarayaal af-Soomaaliga.

Shirka ayaa lagu soo bandhigey qalabka hidaha & dhaanka ee bulshada Soomaaliga ku hadaashaa caadada u leedahay, waxaana lagu qurxiyey calamada Soomaaliya, Jabuuti Itoobiya iyo Kenya oo ah dalalka looga hadlo afka Soomaaliga Waxaa la qiyasaa in af-Soomaaliga a ku hadlaan dad ka badan 15 milyan oo qof.

Madaxweynaha Jabuuti MD. Ismaaciil Cumar Geele ayaa ka hadley munaasabadda, waxaana uu ku dheeraadey qiimaha ay leedahay in dal afkiisa uu hormariyo, haddii taas la waayona

dadkaasi ay yihiin kuwo qiima beelaya. Ismaciil Cumar Geele ayaa soo hadal qaadey weerarkii al-Shabaab ay ka dhex fuliyeen Hotel Central, waxaana uu sheegay in aanu garanayn sababta al-Shabaab ay dadka Soomaaliyeed u dilayaan.

Madaxweynaha Soomaaliya ayaa dhankiisa sheegey in manta ay dhagax-dhigeen xarun dib u soo nooleyneysa dhaankii Soomaaliga iyo Afkiisa, waxaana loogu magacdarey Akadeemiyad Gobaleedka Afka Soomaliga (AGA).

Dal ma hor mari karo ilaa iyo luuqaddiisa mooyaane, Afka hooyo haddii aan la horumarinin wuu lumayaa, isticmaalkiisa meesha ayuu ka baxayaa, marka waxaan xoogga saareynaa sidii lagu horumarin lahaa luuqadda Afka Soomaaliga, sida caalamka ay afafkooda u horumariyeen oo kale ayuu yiri Madaxweyne Xasan.

Xuska maalinta afka hooyo ayaa sanadkasta la xusaa 21 feberaayo. Hay'adda UNESCO ee Qaramada Midoobey ayaa sanadki 1999 u asteysey 21 Feberaayo maalinta caalamiga ah ee la xusaayo afka Hooyo, waxaana la isku dhiirigeliyaa hor marinta iyo ku hadalka afka Hooyo.

**Wadahadaladii Dowladda Federaalka iyo Somaliland oo burburay!**

Waxaa si rasmi ah dib u dhac ugu yimid wadahadalkii la filayay in uu dhexmaro wafuud kala matalaysa Dowladda Federaalka ee Soomaaliya iyo maamulka la magacbaxay Somaliland oo ka furmi lahaa magaalada Istanbul ee dalka Turkiga.

Warsaxaafadeed kasoo baxay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya ayaa si rasmi ah lagu shaaciyey in wadahadalka uu furmi waayey isla markaana wefdiga ka

socda Dowladda Soomaaliya ayaa dib ugu laabtey, magaalada Muqdisho Qoraalka ayaa lagu eedeeyay maamulka Somaliland in uu ka dambeeyo dib u dhaca wadahadalada kadib markii ay ka biyo diideen , xubnaha Dowladda Federaalka oo qaarkood kasoo jeeda gobolada Waqooyi.

# Xuska Maalinta Haweenka Adduunka oo laga dhigay Moqdisho




Maalinta caalamiga ee Haweenka Aduunka ayaa lagu qabtay xarunta Gaadiidka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee magaaladda Muqdisho, waxaana ka qeyb galay Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud, Wasiiro ka tirsan Xukuumada Federaalka Soomaaliya, Xildhibaano,Taliyaha hay'ada Nabad Sugida iyo Sirdoonka Qaranka,Haweenka ka kala yimid degmooyinka gobolka Banaadir,Ururada Haweenka ee ka jira gobolka Banaadir iyo gobolada dalka qaar, Ururada u dhaq dhaqaaqa Xuquuqda Haweenka, Ardayda Jaamcadaha, Bahda Saxaafadda iyo marti sharaf kale.

Goobta munaasabada 8da Maarso ay ka dhaceysay ayaa dhammaan dadkii kala duwanaa ee ka soo qeyb galay xuska maalintan waxay dareen ahaan ay aad ugu faraxsanaayeen maalintan Haween Weynaha Aduunka, waxaana ay ku labisnaayeen dharka ka sameysan calankeena Buluuga ah,Haween uu ka muuqday u diyaar garowga maalintan qiimaha weyn u leh dhamaan Haweenka Aduunka, sidoo kale waxaa si weyn loo adkeeyay amaanka goobta ay munaasabadu ka dhaceysay.

Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ayaa salaam sharaf ka qaatay cutubyo ciidanka Booliska Soomaaliyeed ka tirsan iyadoo Kooxda Baambeyda ee Ciidanka Booliska Soomaliyeedna ay garaaceen Astaanta Qaranka Soomaaliyeed.

Intaas ka dib gabdhaha ciidanka ah ee Booliska iyo Militariga iyo sidoo kale haweenkii kale ee kasoo qeyb galay munaasabada ayaa socod kusoo maray halka uu fadhiyay Madaxweynaha dalka.

Qaar ka mid ah Haweenkii Munaasabadan ka qeyb galay oo la hadlay warbaahinta Qaranka ayaa sheegay in ay ku faraxsan yihiin u dabaaldega munaasabada 8da Maarso.

Wasiirka Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha ee Xukuumada Federaalka Soomaaliya Sahro Maxamed Cali Samatar oo goobta ka hadashay ayaa sheegtay in wasaarada Haweenka ay sanadkan diyaarisay qorshayaal lagu horumarinayo Haweenka Soomaaliyeed.

Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa hamblayo ku aadan 8da Maarso u diray Haweenka Soomaaliyeed iyo guud ahaan Haween weynaha Aduunka.

Mudane Xasan Sheekh Maxamuud Madaxweynaha dalka ayaa sheegay in Haweenka Soomaaliyeed ay kaalin weyn ka qaateen horumarka dalka.

Ugu dambeyn Madaxweynaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ayaa ugu baaqay dhamaan haweenka Soomaaliyeed in sanadkan 2015ka uu noqdo sanad ay horumar balaaran sameeyaan haweenka Soomaaliyeed isla markaana ay sameeyaan mashruucyo badan oo lagu horumarinayo haweenka Soomaaliyeed.

Sanadku markuu ahaa 1977dii ayay aheyd markii Qaramada Midoobay ay u aqoonsatay 8da Bisha Maarso in ay tahay maalinta Caalamiga ah ee Haweenka Aduunka.

# Hay'adda Cilmibaarista Badaha Soomaaliyeed oo soo Bandhigtay Waxqabadkeedii 2014.




Hay,adda  Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed, waxay soo qaban qaabisey taariikhdu markay ahayd, Arbaco  11/03/2015  munaasabad ballaaran oo ay kasoo qaygaleen  qaar ka mid ah Golaha Wasiiradda Dowladda Fedraalka, xildhibaano, Agaasimayaal, Saraakiil katirsan Ciidanka Xoogga, Haweenka qaranka, Saxaafadda, Shaqaallaha katirsan Hay,adda, iyo marti sharaf aad ufara badan tiradooda aysan ka yareyn 100 qof.
Ugu horeyntii waxaa munaasabadda daah furey

Adm. Prof/ Faarax Axmed Cumar (Faarax Qarre) oo ah Gudoomiyaha Hay'adda Cilmi Baarista Badaha Soomaaliyeed, ahna Taliyihii hore ee Ciidanka Badda.

Prof/ Farax Qarre ayaa soo dhaweyn u sameeyey aad u heer sareysa, dhammaan kasoo qaygalyaasha xafladda, soo dhaweyn kadib wuxuu guda galay Prof/ Faarax Qarre ujeedada loo qabtey munaasabaddaan, wuxuuna sheegay inay tahay, soo gudbinta waxqabadkii Hay'adda mudadii sanadka ahayd iyo waxa u qabsoomay qorshe hawleedkii ay degsatay 2014, wuxuu sii raaciyey Prof. Faarax Qarre waxaad arki doontaan maanta Shaqaddii aan qabaney Sanadkaas aniga iyo kooxdaan hogaanka u ahay, waxaanna xusid mudan mudadaas

aan ku hawlanayn, shaqadaan inaysan jirin wax mushaarooyin ah ama gunooyin ah oo Dowladda aan ka helnay, sidaas oy tahay waxaan qabanay Shaqo aad u fara badan oo mudan in lanagu daydo.



Kadib waxaa laguda galay, Soo bandhigidda waxqabadkii Hay'adda oo uu ka hor akhriyey dadka Mudane Axmed Bashiir Maxmed Cali oo kamid ah cilmi baarayaasha hay'adda, Mudane axmed bashiir wuxuu ku bilaabay hadalkiisa; Hay'adda waxay Shaqadeeda ku bilowdey 2014 qorshe hawleed ay dajisatey, waxaanna ugu horeeyey qorshe hawleedkaas, soo ururinta dhammaan Qawaaniinta Badda, ee dalka uu leeyahay iyo kuwa Caalamiga ahba, si loo sugo lahaanshaha Baddeena, waxaanna lasoo bandhigey kutubtii la diyaariyey ee sharciga badaha, oo mid mid loo tusay dadka goob jooga ahaa, waxaanna ugu muhimsanna Buugta Qawaaninta lasoo bandhigey, Sharciga Badaha Soomaaliyeed Lr.05 26\01/ 1989 oo

ay soo saartay Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Gaadiidka Badda, Sharcigaan waxaa ka bad baadey hal nuqul oo Prof/ Faarax Qarre uu hayey isagoo xiligaas ka ahaa Wasaaradda lataliye, waxay Hay'addu ku dadaashey gaar ahaan Waaxda Qaanuunka in dib loo qoro oo kumbuyuutar lagu garaaco, maadaama nuqulkii hore uu ku qornaa Makiinadda teebka, waxaanna lagu xoojiyey meelaha qaybtood, Qaanuunka UNCLOS ee Caalamiga ah, waxay Waaxdu kaashanysay mar walba, Gudoomiyaha hay'adda Adm. Faarax Qarre oo khibrad dheer u leh arimaha Badaha gaar ahaan Sharciga, waxaa kaloo lasoo bandhigey oo waxqabadka kamid ahaa Buug ay soo saartey hay'adda, sida Buugga **Tapographiyada** oo sharaxayamasaaxadda Baddeena iyo xuduudaheeda ay lawadaagto dalalka kale, Jaziiradaha dalka uu leeyahay, laashashka iyo shacaabyada, Buugan oo cilmi badan uu ku duugan yahay waxaa diyaariyey Gudoomiyaha hay'adda Adm.Gaas Prof. Faarax Axmed Cumar, waxaa kaloo la qorey Buug ka hadlaya Culuumta Badda waxaanna Qorey Eng/ Cabbas Nuur Mahdi, oo ah Agaasimaha Waaxda Culuumta Badda ee hay'adda, waxaa kaloo kamid ahaa buugtii lasoo bandhigey buug ka hadlaya daraasad lagu sameeyey, xeebta Caasimadda oo ay ka socoto Burburin Deegaan baddeedka Caasimadda iyo wasakheyn biyaha dalka, waxaa kaloo lasoo bandhigey buug ka hadlaya Suuqa Kalluunka Magaalada Muqdisho oo ka hadlaya iibka kalluunka iyo tirada maalin walba la keeno celcelis ahaan oo muddo sanad ah la daraaseynayey.

Waxaa xusid mudan in lasoo bandhigay muuqaal Projector ah oo diiradda lagu saaray, burburinta kasocota xeebaha Magaaladda Muqdisho, wasakheyta deegaanka xeebta, Dabar Goynta xayawaanka Qubada, waxaa lagusoo bandhigey muuqaalkaas dhibaatada ka jirta xeebaha dalka gaar ahaan tan Caasimadda.

Gaba gabaddii munaasabadda ayaa waxaa Shahaado sharaf la gudoonsiiyey qaar kamid ah, Shaqaalaha Cilmi Baarayaasha oo dadaal badan bixiyey mudadii sanadka ahayd ee hay'addu ay shaqeynaysay, waxaa kaloo la gudoonsiiyey qaar kamid ah dadkii wax ka aas aasey hay'adda, Shahaada sharafta waxaa gudoonsiiyey xubnihii masuuliyiinta ahaa ee xafladda goob jooga ka ahaa, waxaanna kamid ahaa Wasiir ku xigeenka W/Haweenka iyo Xuquuqul

Insaanka, Xildh/ Marwo Muumino Sheikh Cumar, Xildhibaan Sacdiyo Careys Ciise, Gudoomiyaha ururka Haweenka Marwo Batuulo, iyo Gen/ Maxmed Saalax oo hogaaminaya dhowr Janan.

Munaasabada ayaa waxay kusoo dhamaatay jawi aad u qurux badan, oo aad loogu riyaaqay dhammaan goob joogayaasha munaasabadda, kadib waxaa shir jaraa'id qabtey Gudoomiyaha Hay'adda Adm.Gaas/ Faarax Axmed Cumar oo uu ugu waramay Saxaafadda goob jooga ahayd madasha xaflada kasocotey wuxuuna Admiraalku fariin u direy, shacabka Soomaaliyeed oo uu yiri; HALA ogaado Badda hana loo soo jeesto Badda, waxaan leenahay

bad baaxadda dhulkeena ka weyn 2jeer, marka waan garan karnaa fa’idada ay leedahay baddaas.

**Shir weynaha labaad ee dib u-eegista waxbarashada Puntland oo Garowe ka furmay.**

MARSO 15, 2015

Waxaa ka furmay Caasimadda Puntland ee Garowe shir looga hadlaayo hormarinta iyo dib u eegista waxabarashada Puntland.

Madaxweynaha Puntland Dr Cabdiweli Cali Gaas ayaa shirka si rasmi ah u furay.

Shirka waxaa ka soo qaybgalay Wasiirka Waxbarashada & Tacliinta sare ee Soomaaliya Drs. Khadra Bashiir Cali, Wasiirka Waxbarashada Puntland Cali Xaaji Warsame, Saraakiil ka socdey hay’adaha taageera Waxbarashada Puntland, Soomaaliya iyo marti sharaf kale oo badan.

Shirkan ayaa ah kii labaad ee Wasaaradda Waxbarashada & Tacliinta sare ee Puntland ay qabato, waxaana dib loogu eegayaa wixii ka qabsoomey himilooyinkii la doonaayey in la gaaro ee la asteeyey sanadkii hore, waxaana halkudhig sanadkan looga dhigey, Waxbarasho tayo leh oo loo siman yahay.

Madaxweynaha Puntland Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta sare ee Puntland ku amaanay horumarka iyo dadaalka ay wadaan waxaana uu yiri:
“Runtii wasaaradani waxay noo tahay wasaarad ku dayasho mudan marka la eego shaqada ay hayso iyo guusha ay u soo hoysay Puntland, waana ku mahadsan yihiin halka wanaagsan ee ay maanta gaareen”

Madaxweynaha Puntland ayaa khudbaddii furitaankiisa uga hadley muhimadda ay leedahay waxbarashadu isaga oo kaashanaya khibradiisa shaqo, waxaana uu yiri:
“Hadii aynaan dadkeena waxbarin, hadii aynaan teknoolajiyad yeelan, hadii aynaan kaabayaasheena dhaqaalaha horumarin aqoon mahelayno, horumarna samaynmayno meelna ma gaarayno”.

Madaxweynaha ayaa ballan qaadey in la kordhin doono tirada macalimiinta, miisaaniyadda sanadkana loogu dari doono 200 oo macalin in la diiwaan geliyo.

Dhanka kale Madaxweynaha Puntland ayaa sheegay in weli ay waxbadan ka filayaan Wasaaradda Waxbarashada ee Dowladda federaalka, waxna uga maqan yihiin weli.

Sida la ogaadey dalalka horumrey waxay hubiyaan tayada Macalinka ardeyga waxbaraya, macalin tayo leh ayaa soo saari kara ardey tayo leh oo isbeddel keeni kara.

Wasiirka Waxabarashada & Tacliinta Sare ee Soomaaliya Drs. Khadra Bashiir oo khudbad ka jeedisey furitaankii shirka ayaa sheegtey, in loo baahan yahay iskaashi dhex-mara Waxbarashada Soomaaliya oo dhan, Waxaana ay Puntland ku amaantey in Waxbarashadeedu wanaagsan tahay, Soomaaliya oo dhana la doonaayo in ay uga dayato.

Wasiirka Waxbarasha & Tacliinta sare ee Puntland Cali Xaaji Warsame ayaa sheegay in ay tayeynayaan Waxbarashada lana gaarsiin doono magaalo ilaa Tuulo, Gabdho iyo wiilalba ay u siman yihiin.

# **Weerarkii lagu qaaday Hotelka Maka Al-Mukaramah**.



waxaa 27kii bisha Maarso 2015, weerar lagu qaaday Hotel Maka Al-Mukarama ee magaalada Muqdisho, weerarkaas oo mudo 12 saacadood ka badan socday, ka dib

markii baabuur wax yaalaha qarxa laga soo buuxshay lagu qarxiyay albaabka danbe ee hotelka, ka dibna ragg hubeysan ee gudaha u galeen hotelka, taasoo keentay in khasaaro iskugu jiro dhimasho, dhaawac iyo mid hantiyeed ba leh.

waxaana ku dhintay dad gaarayo 20 qof, waxaana ka mid ahaa, Safiirkii dowlada Somaaliya u fadhiyay dalka swizerland Yuusuf Beriberi iyo dad kale oo badan, sidoo kale dhaawac intaas ka badan, ayadoo ey jiraan dad badan ee ciidamada dowlada u gurmadeen. Shir jaraa'id uu qabtay RW Sharmaarke ayaa u tacsiyeeyay ehelada dadkii naftooda ku waayay isla markaana sheegay in laga guuleysan doono qas wadayaasha.

# Bannaan bax lagu Diidan yahay Faragelinta Qaawan ee Shirkadda Talyaaniga ENI ay ku hayso Badda Soomaaliya

Qore: Abukar Ibrahim Wasiir ku-xigeen hore.




17 Marso, 2015 waxaa fagaaraha Caanka ah ee Daljirka-Dahsoon-Magaalada Muqdishu iskugu soo baxay dadwayne aad u fara badan oo ka kala socday qaybaha bulshada rayidka ee ku dhaqan Gobolka Banaadir. Bannaan-baxa waxaa soo abaabulay iskuna soo dubba riday Midawga Daladaha




Ururada Rayidka ah ee ka hawl-gala Bartamaha iyo Koofura Soomaaliya ee lagu magacaabo (SOSCENSA).

Dadwaynaha soo bannaan baxay, waxay iskugu jireen aqoon-yahan, hoggaan-dhaqameed, dhallinyaro, haween, xoogsato, Macalimiin, ardayda wax ka barata jaamacadaha, dugsiyada sare iyo kuwo dhexe ee Magaalada Muqdishu iyo nawaaxigeeda. Bannaan baxa yaasha, waxay soo bandhigeen cabasha xooggan oo ay uga soo horjeedaan fara-gelinta sharci darrada ah ee ay Shirkadda Talyaaniga ENI ku hayso badda Soomaaliya shidaal baaris sharci darro ah.

### Halku dhigyada Bannaan baxayaasha

Talyaaniyow ka bax badda Somaliyeed

- ✓ Talyaaniyow kadaa Boobka Khayraadka Badda Soomaaliyeed
- ✓ Shirkadda E N I jooji shaqada ee ka bax badda Soomaaliyeed
- ✓ Shirkadaha Kalluumaysiga ha joojiyeen Jillaabashada sharci darrada ah, hana ka baxeen badda Soomaaliya.

Nuqul lagu asteeyay cabashada bannaan baxa-yaashaa ayaa ugu dambayntii loo dhiibay saxaafadda xurta ah iyo Safiirka Dawladda Talyaaniga ee Muqdishu ka fadhiya.

Dawladda Talyaaniga ayaa laga filayaa in ay xilkeeda ka soo dhalaasho, kana saarto sida ugu dhaqsiyaha badan shirkaddeeda ENI biyaha Soomoaliya. Xiriirka taariikhiga ah ee u

dhaxeeya Dawladdaha Soomaaliya iyo Talyaaniga iyo saaxiibtinimada labada shacbi ayaa mudnaan gaar ah leh.

Sidaa darteed, shacabka Soomaaliyeed wuxuu sugayaa go'aan degdeg ah iyo jawaab celin ay dawladda Talyaaniga ka bixiso dhawaaqa cabasho ee shacabka Soomaaliyeed.

# Dhacdooyinka Muhimka Ah Ee Badaha Bilihii Febraayo Iyo Maarso 2015

W/D: Ahmed Omar Abshirow

## Dhoof Badeed Sharci Darrada ah (Tahriibka)



Ciidamada Badda ee Maamul-Goboleedka Puntland oo kaashanaya Ciidamada Booliska Gobolka Bari ayaa ku guuleystay in ay gacanta ku dhigaan dad ku guda jiray dhoof badeed sharci darro ah (Tahriib) taariikhdu markay aheyd 12.03.2015. Dhalashada tahriibayaashaa ayaa lagu sheegay Soomaali iyo Itoobiyan. Saraakiisha tira-koobka Puntland ayaa xaqiijisay in tirada Tahriibayaasha ay ahayd 106 qof, 80 ragg ah iyo 26 haween ah. Dadkan ayaa danaynaayay in ay u tallaabaan dalka Jamhuuriyadda Yemen, una bareeray safar aan waafaqsanayn qawaaniinta dhoofka dunida iyo sharciyada dalalka lagu galo. Tahriibayaasha tiradooda ay intaa la ekayd ayaa adeegsanaayay doon aad u yar oo si aan caqli gal ahayn u buux dhaafiyeen markii gacanta lagu dhigaayay.

Taliyaha Ciidanka Badda Puntland Admiral C/risaaq Diiriye ayaa Saxaafadda u sheegay in dadka la soo qabtay ay ku jireen kuwii mas'uulka ka ahaa falka sharci darrada ah. Taliyaha wuxuu ku nuuxnuuxsaday in hawl-galka noocaan ah uu socon doono ilaa iyo inta laga dabar-gooynayo dhoof badeedka sharci darrada ah (Tahriibka).

Waxaa xusid mudan in sanad kasta, si naf-biimayn iyo sharci darro ku dhisan ay dad kumannaan gaaraya uga dhoofaan xeebaha Soomaaliya. Dadkan ayaa tallaabadooda hore ku

doonayo in ay gaaraan dalka Jamhuuriyadda Yemen, ka gadaalna halkaa uga sii gudbaan wadamada hodanka ah ee Khaliijka Arabta. Dadkan tahriibaya waxay ka soo jeedaan dalalka Geeska-Afrika sida: Soomaaliya, Itoobiya iyo Eratareya. Asbaabta salka u ah tahriibka ayaa lagu koobaa:

1. Xasilooni darri 2. Fursad shaqo la'aan 3. Hormar la'aan weli ku baahsan dalalka Geeska Africa. Si looga hortago dhoofkan sharci darrada ah, hay'adaha caaIamiga, saxaafada madaxa bannaan ayaa isku hawlay, dadaallo lagu wacyi-gelinayo muwaadiniinta wadamadan si ay uga waantoobaan u bareeridda khatarta ah.

Nasiib darro, waxaa suura gal noqon wayday in la qanciyo ama la-loodiyo maanka tahriibayaasha oo ay hareeyeen muuqaallo dhalanteed ah oo ay ku doonayaan inay gaaraan dal kale si ay u helaan barwaaqo iyo nolol raaxa leh, In ay riyadaa u dhabowdo iska daaye, tahriibayaasha waxay waayaan hantida yar ee faraqooda ku harsan iyo naftooda qaaliga ah. (6).

## La-haystayaal la sii daayay



Wakiilka Qaramada Midobay ee dalka Soomaaliya Ambasatoor Nichalos Kay ayaa soo dhaweeyay sii deynta 4 badmaaxiin ah 13kii bishan Maarso, 2015, ay sii daayeen burcad badeed afduub u heysatay muddo 4 sano ah. Badmaaxiintaan ayaa ka shaqaynayay markab lagu magacaabo VF Prantalay 12,
oo ay koox burcad badeed ah af-duubatay 18kii April, 2010.

(6) **Horsed media.net March 13, 2015**

Shaqaalahaan oo dhalashadoodu tahay dalka Tayland ayaa kooxdii heysatay waxa ay ku wareejisay maamul Goboleedka Galmudug, taariikhdu markay ahayd: 25/02/2015. Shaqaalahan ayaa noqday kuwii ugu mudada dheeraa oo ku jiray gacan burcad badeed Soomaali ah iyadoo afduub loo haysto.

Mr. Key oo u mahad celiyay dhammaan dadkii ka qayb qaatay sii-daynta Shaqaalahaa, ayaa dhinaca kale ku baaqay in la sii daayo 26 ruux oo weli ku harsan gacanta burcad badeedda Soomaalida. Guud ahaan howl-galladii af-duubka maraakiibta agagaarka xeebaha Soomaaliya ayaa hoos u dhacay. Taabba-galidda tallaabada lagu hakiyay firfircoonida burcad badeedda Soomaalida ayaa ku timid baraarug caalami ah iyo iskaashi heer gobol. Intii lagu guda jiray hawl galka ka dhanka ah burcad badeedda Soomaalida ayaa waxaa suura gashay in la qabto da'yar Soomaaliyeed oo ay tiradooda gaartay 1,300 (Kun iyo seddex boqol qof). Dhallin yaradan waxaa loo haystaa eedaynmo kala duwan oo dhammaantood lala xiriirinayo falal burcad badeed. [7]

## Koox Ciidamada Badda ka tirsan oo tababar loogu soo xeray Jabuuti



**Ciidankii oo ku soo laabtey dalkooda**

Waxaa dalka dib ugu soo noqday 9-kii Maarso, 2015, 38 askari oo ka kala socday Maamul goboleedyada Puntland iyo Galmudug, askartan ayaa ka tirsan ilaalada xeebaha Badda Soomaaliyeed ee hoos yimaada Puntland iyo Galmudug. Waxay tababar laba bilood ah oo la xiriira ilaalinta xeebaha ku soo qaateen dalka Jamhuriyadda Jabuuti. Aqoon korosiga iyo dib u hawlgelinta ciidankan ayaa ku soo beegmaysa xilli baahida ciidanka noocan ah loo qabo ay cirka isku shareertay, cabashooyin iyo qayla dhaan jirta darteed.

---

(7) w.w.w.Jowhar.com, Friday 27, 2015

Xod lagu duuli karo ayaa laga helayaa kaluumaysatada Soomaaliyeed ee ka jilaabata kalluunka degaanada u dhaxeeya xeebaha Gobollada Dhexe ilaa iyo Degmada Ayl ee Gobolka Bari. Kalluumaystada Soomaalida ayaa xaqiijisay in uu jiro kalluumaysi sharci darro ah oo ay ku kacayaan maraakiib iyo doonyo shisheeye oo aad u waawayn casrina ah.

Maraakiibtan sida sharci darrada ah uga kalluumaysta biyaha Soomaaliya ayaa ku ah halis kalluumaystada Soomaaliyeed iyadoo isla markaana u gaysanaysa xaalufin khayraadka badda Soomaaliya.

Waxaa dhab ah in aan marna lagu hakin karin kalluumaysiga sharci darrada ah ee ka socda biyaha Soomaaliya cabasho iyo waraaqo loo gudbiyo hay'adha caalamka oo kali ah. Haddaba, si wax looga qabto loona xakameeyo falalkan sharci darrada ee joogtada noqday, waa in dib loo qaabeeyo lana dhiso Ciidanka Badda Soomaaliyeed oo leh tiro iyo tayo looga hor tago khataraha la soo gudboonaada nabadgelyada kalluumaystada iyo khayraadka dabiiciga ah ee badda Soomaaliyeed[(8)].

## Wasiirka Kalluumeysiga oo la kulmay Mas'uuliyiinta Hay'adda FAO.



Wasiirka Kalluumaysiga iyo Kheyraadka Badda ee Xukuumada Federalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cumar Caymooy oo ay wehilyaan Wasiir ku-xigeenka iyo Agaasimaha guud ee Wasasaradda ayaa la yeeshay kulan madax ka socotay Hay'adda Qaramada Midoobey u qaabilsan Cuntadda iyo Beeraha (FAO). Kulanka qodabada looga hadlay waxaa ka mid ahaa: 1. Hormarinta xirfadda kalluumaysatada Soomaaliya, 2. In FAO ay Wasaaradda gacan kaa siiso sidii ay dhidibada loogu aasi lahaa Anteeno lagula socodo dhaqdhaqaaqa maraakiibta shisheeye ee falalka sharci darrada gaysanayso. 3. In FAO ay gacan ka gaysato dhamaystirka qalabaynta casriga ah ee ay Wasaaradda hiigsanayso si ay uga soo dhalaasho mas'uuliyadda ay ku aadan tahay.

(8) Websit-ka Radio Muqdisho.net

# Xuquuq lacageed oo ay heli doonaan xubnaha hore xilalka sare u soo qabtay dawladda



Guddiga joogtada ah ee golaha baarlamaanka Soomaaliya oo uu kulan uga socday magaala madaxda dalka Uganda ee Kampala ayaa ka dooday xaquuq lacag ah oo ay yeelanayaan mas’uuliyiinta xilalka sare u soo qabtay dowladda Soomaaliya.

Xoghayaha guud ee golaha Baarlamaanka Soomaaliya Cabdikariin Xaaji Cabdi (Buux) oo markii uu kulanka soo idlaadey la hadlay warbaahinta ayaa tilmaamay in kulanka intii uu socday ay xubnaha guddiga joogtada ah ay isla jaangooyeen xuquuq lacageed oo ay yeelanayaan mas’uuliinta xilalka sare ka soo qabtay dowladda, kuwaa oo iskugu jira kuwo shaqada waayay ama noqday hawl gab ku yimid xanuun ama da'. Buux ayaa xusay muhiimadda go'aan ka gaariddda arintan ay u leedahay dadka Soomaaliyeed guud ahaan, gaar ahaan xubnaha xilalka soo qabtay iyo qoysaskooda. Waxaa intaa dheer in guddiga joogtada Baarlamaanka Soomaaliya uu kulan kiisa ku dhamaystiray qorshayaasha kalfadhiga 6aad ee Baarlamaanka Soomaaliya .[9]

[9] Xog-doon (Daily News Paper), AXAD 15 March, 2015 Cadadka 964-aad, Sanadka 4-aad Bogga 3aad.

# Madax Wareer:




***Sheekadii 17 Geela:***

Oday ayaa wuxuu u dardaarmay wiilashiisi saddexda ahaa, wuxuuna ku yiri: Waxaan idinkaga tagay 17 (toban iyo todobo) Neef oo Geel ah, waxaadna u qeybsaneysiin haddii aan dhinto sidan: wiilka wayn nus ha qaato, wiilka dhexe saddex u dhig meel ha qaato, wiilka yarna sagaal u dhig laba meel ha qaato. Duqu

wuxuu ku daray dardaarankiisii: Geela yaan la gadin yaana la qalin ee asagoo nool qeybsada.

Duqii markuu dhintay Geelii waa la qeybin waayay, waayo 17, laba looma qeybin karo iyo 3 iyo sagaal midna. Cid kasta oo culimo iyo wax garad ah oo qeybsa Geelii waala waayay.

Ugu danbeyntii oday xakiim ah ayey u tageen wuxuuna ku yiri: " galabta gurigiina igu suga".

Odaygii wuxuu yimid galalbtii isagoo wata Hal uu leeyahay. Hashiisii Geelii ayuu ku daray waxayna isku naqdeen 18 Neef. Wiilkii weynaa wuxuu siiyey nus = 9, wiilkii dhexe Tulut = 6, kii yaraana Tusuc = 2, wadartii Geela uu qeybiyey waa: 9+6+2=17. Dabadeed wuxuu macsalaameeyey wiilashii isagoo Hashiisii dib u ceshaday.



# Dhoola Cadeyn

1. Waxay yiraaheen Madaxwayne Max'd Siyaad ayaa tegay isbitaalka dadka waalan si uu u soo eego xaaladda bukaanka iyo waxa loo qabto.

sidii caadadu ahayd waxaa lagu soo dhaweeyay Jaale Siyaad heestii Guul wade Siyaad, ayadoo laba saf loo taagan yahay.

Saf waa dadkii waalnaa, safka kalena waa shaqaalihii isbitaalka. Waxaa si wanaagsan heestii ugu qaaday, kuwii maskaxda looga jiray kuwii dharka cadcadaa, waa shaqaalahee, shib ayey ahaayeen. Jaalle Siyaad ayaa weydiiyey Agaasimihii isbitaalka sababta dhar-caddu ay u qaadi weysay heesta oy u shibanaayeen. Agaasimihii wuxuu ku yiri: Shaqaalahan madaxa loogama jiro.

2. Odayaal Soomali ah iyo kuwo Yaman ah ayaa ka sheekaystay halka (asalka) ay ka soo jeeddo Somaalidu. Oday Soomaali ah ayaa yiri: Waxaan nahay ilmihii Caqiil Bin Abii Daalib oo ina adeer la ahaa Nabi Mux'ed (cs). Oday Yamani ah ayaa qaatay warkii, wuxuuna yiri: Ma diidani in Soomaalidu ay tahay ilmihii Caqiil Bin Abii Daalib, laakiin waxaa iga su'aala halka ay jiraan carruurtii labadii kun (2000) ee Addoontii Cabduraxmaan Binu

Cawf. Warkiina halkaas ayuu ku idlaaday oo meeshii waa lagu kala cararay.

3. Xaas ayaa ku tiri Seygeedii: Waligaa indhaha ma saartay naag qurux iyo qaayo igu soo gaari karta, ninkii ayaa ugu jawaabay: Ina Jaamacey: Beledkaan waa la isla joogaa, wixii aad tahayna waan ku ogahay.

4. Nin gaajeysan ayaa tagey makhaayad nin Carab ah uu ka shaqeeyo; wuxuu ku yiri Carabkii: Maxaad haysaa; wuxuu ugu jawaabay Carabkii Maafish. Ninkii ayaa ku yiri maafishta nafteeda ii keen. Carabkii ayaa la yaabay oo yiri: Waa Majnuun. Kii gaajeysnaa ayaa ku yiri Carabkii; Majnuunka laftikiisa maraq fiican iigu soo yeel, soona dhaqso. Carabkii indhaha ayuu taag taagay, wuuna dhuuntay.

5. Oday ayaa sakaraaday, wuxuuna yiri: waa adduunyo dub ee Towxiidka Alle ha na haleeshiiyo, nin meesha jogay ayaa ku yiri: hadda adiga kaliya ayey adduunyo kaa duubmaysaa ee Towxiidka Alle ha kugu dawo.

5. Labo habar ayaa sheekaysatay, mid ayaa ku tiri tii kale imisa ayaad jirtaa? afartankii ayaa afar iiga dhiman tahay ayey ku jawaabtay; way la yaabtay jawaabta, waayo duq ayey ula muuqatey, markaas

waxay ku tiri: Carruur ma leedahay, imise ayaa qaan gaareen, waxay ugu jawaabtay: wiilka aan ayeeyada u ahay ayaa darraad ka qallinjabiyey Jaamacadda, carruur badanna wuu leeyahay; markaas ayey ku tiri tii kale: iska daa afartan ayaa afar iiga dhiman tahay ee waxaad adduunyada u joogtid ayaaba amankaag ah.

6. Nin ayaa ugu yeertay xus akhyaar iyo culumo, markii uu u loogay ayuu soo xiray Wan, wuxuuna ku yiri waayeelkii: Wankaan ha laga duceeyo, wardina ha loogu aqriyo hal Geela ah oo ilmaha ila soo korisay si ilaahay qabrikeeda qabow ugu siiyo. Cid kasta maradey afka gashatay, ninkiina Wankii wuu bireeyay, asagoo aaminay in dadka shib yiri ay wardi u aqrinayaan Hashii.

7. Ninn Macalin ah ayaad loodiray Tuulo si uu wax ubaro Reer Baadiyaha, Maalin ayuu dhigaayey, Xisaab kala goyn ah, waxayna ahayd sidan: Seddex haddii Todobo laga jaro (7-3), imisa ayaa soo hartay, way fahmi waayeen, markaa wuxu ku yiri: ka warama haduu dhurwaa ku soo dhaco 7 riyaad oo xerro ku jirra oo seddex qaato imisaa xerradii ku soo harytay. Mid ka mid ah ardaydii ayaa yiri: Macallin riyaan kaa aqaan, haduu dhurwaa yimaado midna xerrada kuma haraayo !!!.

# Xikmado

1. Indhahaaga mid ku eeg maanta , tan kalena berri.

2. Haddii aad hawl qabatid hagaaji.

**3.** Dhawaaca seeftu wuu bogsadaa, kan carrab kuse ma bogsado.

4. Dalka hooyo ayaad dad ku tahay.

5. Noloshu waa nabad iyo naaxsanaan.

6. Biyo gacmaahaga ayaa looga dhargaa.

7. Far kaliya fool ma dhaqdo.

.